- Naga hel macluumaadka soo socda, haddii aad codsato. Ka wac Adeegga Macmiilka lambarka taleefanka ee qaybta 1.

- Haddii aan isticmaalno qorshaha dhiirigelinta dhakhtarka ee saameeya isticmaalka adeegyada gudbinta, iyo faahfaahinta qorshaha haddii aan isticmaalno mid
 - Natiijooyinka daraasad dib u eegis tayada ee dibadda ah oo ka timid gobolka
 - Aqoonta xirfadlayaasha ee bixiyayaasha daryeelka caafimaadka
- Soo jeedi talooyin ku saabsan siyaasadda xuquuqdeena iyo waajibaadkeena.
 - Ku dhaqan xuquuqda halkan ku qoran halkan.

Qeybta 4. Masuuliyadaha Xubinta

Waxaad haysataa masuuliyada inaad:

- Akhriso *Buug-yaraha Xubinta* oo ogow adeegyada hoos yimaada qorshaha iyo sida loo helo.
- Tusto kaarka aqoonsiga xubinta qorshahaaga caafimaadka iyo kaarka barnaamijka daryeelka caafimaadka Minnesota mar kasta oo aad hesho daryeel caafimaad. Sidoo kale tus kaararka caymiska kale ee caafimaadka aad leedahay, sida Medicare ama caymiska gaarka ah.
- La samee xiriir daryeel bixiye caafimaad oo u qalma shabakada Plan ka hama intaadan jirran. Tani waxay kaa caawinaysaa adiga iyo bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga inaad fahantaan wadarta xaaladaada caafimaad.
- Sii macluumaadka uu ku weydiiyo bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga iyo/ama qorshaha caafimaadka si daryeelka saxda ah ama adeegyada lagu siiyo. La wadaag macluumaadka ku saabsan taariikhdaada caafimaadka.
- La shaqee bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga si aad u fahanto wadarta xaaladaada caafimaad. Samee yoolalka daawaynta ee la isku raacsan yahay marka ay suurtoagal tahay. Raac qamashayaasha iyo tilmaamaha daryeelka ee aad kula heshiisay dhakhtarkaaga. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan daryeelkaaga, weydii daryeel bixiyahaaga caafimaad ee aqoonta leh.
- Ogow waxa la sameeyo marka ay dhibaato caafimaad dhacdo, waqtiga iyo goobta laga raadsado caawimo, iyo sida looga hamatago dhibaatooyinka caafimaad.
- Ku celceli daryeel caafimaad oo ka hortag ah. Samee tijaabooyinka, baaritaanada iyo tallaalo lagu taliyay oo ku salaysan da'daada iyo jinsigaaga.


Nagala soo xidhiidh haddii aad wax su'aalo ah, walaac, dhibaato ama talo ah qabtid. Ka wac Adeegga Macmiilka lambarka taleefanka ee qaybta 1.

Qeybta 5. Kaadhkaaga Aqoonsiga (Aqoonsiga) Xubinta Qorshaha Caafimaada

Xubin kasta ayaa heli doona kaarka aqoonsiga xubinta qorshaha.

- Had iyo jeer wado kaarka aqoonsiga xubinta qorshahaaga.
- Waa inaad tustaa kaarka aqoonsiga xubinta qorshaha mar kasta oo aad hesho daryeel caafimaad.
- Waa inaad isticmaashaa kaarka aqoonsiga xubinta qorshaha iyo kaarkaaga Barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Minnesota. Sidoo kale tus kaararka caymiska kale ee caafimaadka aad leedahay, sida Medicare ama caymiska gaarka ah.
- Isla markiiba ka wac Adeegga Macmiilka lambarka taleefanka qaybta 1 haddii kaadka aqoonsiga xubinta kaa lumo ama lagaa xado. Waxaan kuu soo diri doonaa kaar cusub.
- Wac shaqaalaha degmadaada haddii kaarkaaga Barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Minnesota uu lumo ama la xado.

Waa kan sambalka kaarka aqoonsiga xubinta ee qorshaha si uu u tusiyo sida uu u eg yahay:



ucare.org

Issuer: **80840**
Name: **JOHN Q DOE**
ID: **0123456789** PMI#: **12345678**
Rx BIN: **003858** Rx PCI: **AA** Rx Sp: **RA**
RxID: **01234567890**
Svc Type: **MANAGED CARE** Group Number: **xxxxxx**
Plan Name: **Minnesota Senior Care Plus**

Issued: **MM/DD/YYYY**

FOR MEMBER USE – For emergency care go to the nearest hospital or call 911.
Customer Service: 612-676-3200 or 1-800-203-7225, TTY: 612-676-6810 or 1-800-688-2534.
UCare 24/7 Nurse Line: 1-800-942-7858 or TTY: 1-855-307-6976
Delta Dental Customer Services: 651-768-1416, TTY users call State Relay 711, 1-855-347-1416
Mental Health and Substance Use Disorder Services: 612-676-6533 or 1-800-323-276-118
Appeals and Grievances: UCare Plan - 612-676-6841 or 1-800-657-3729, TTY: 612-844-2111
1-866-283-8015, TTY: 612-676-6810 or 1-800-657-3729, Delta Dental of Minnesota, P.O. Box 64941,
St. Paul, MN 55164 Managed Care - 612-676-6841 or 1-800-657-3729, TTY 711

FOR PROVIDER USE – All primary claims must be submitted electronically.
For Minnesota subscribers, Delta Dental of Minnesota, P.O. Box 70, Minneapolis, MN 55440-0070.
Prescription drug claims must be submitted electronically to Express Scripts.
Submit chiropractic claims to: Fulcrum Health, Inc., P.O. Box 981808, El Paso, TX 79998-1808
Provider Assistance Center: 612-676-3300 or 1-888-531-1493
Express Scripts Help Desk for Pharmacies: 1-800-922-1557
Submit all dental claims: Delta Dental of Minnesota, P.O. Box 9120, Farmington Hills, MI 48333-9120



Qeybta 6. Qaybsiga Kharashka

Wadaagista kharashka waxa weeye in xubnaha caymiska caafimaadka ay dhici karto inay siiyaan kharashka bixiyahooda adeegyada caafimaadka ama farsamiga. Waxaa kamid ah waxa la iska jaro iyo caymis wadareedka. Laga bilaabo Janaayo 1, 2024, **ma lihid kharash la wadaago oo adeegyada caafimaadka ama farsamiga ah ee hoos yimaada Kaalmada Caafimaadka.**

Kharashka la wada bixiyo;

Lacag bixinta wadaaga ah waxay ku taxan yihiin shaxdan soo socota:

Adeega	Qadarka Lacag bixinta Wadaaga ah
Booqashooyinka aan ka hortagga ahayn (sida booqashooyinka cunaha xanuunka, baaritaanka sonkorowga, qandho sare, dhabar xanuun, adeegyada caafimaadka dhimirka, iwm.) uu bixiyo dakhtar, kaaliyaha dakhtar, kalkaalisada caafimaadka sare, umuliso xirfad leh, takhasusle laf-dhabar, takhasuslaha duritaanka maqaarka, takhasule lugaha, takhasusle maqalka, ama dhakhtarka indhaha.	\$0.00
Hababka baaritaanka (tusaale ahaan, baaritaanka xiidmaha, baaritaanka xubnaha)	\$0.00
Booqashada qolka xaalada degdega ah marka aysan ahayn xaalad degdeg ah	\$0.50
Magaca astaanta dawooyinka	\$0.00
Dawooyinka dhakhtarka qoro ee aan dabiiciga ahayn	\$0.00

Hadii aad haysato Medicare, waa inaad ku qaadataa badi dawooyinka lagu qoro qorshaha Barnamijka Dawooyinka La Qoro ee Medicare (Medicare Part D). Waxa aad yeelan kartaa caymis la wada bixiyo oo kale oo aan lahayn xadidaad bil adeegyada qaar.

Hadii aad leedahay wada bixin, waa inaad siisaa qaybtaada bixiyahaaga. Kala hadal Adeega Macmiilka lambarka taleefanka ee ku qoran Qaybta 1 hadii aad qabto su'aalo.

Qeybta 7. Adeegyada La Daboolay

Qaybtani waxay sharraxaysaa adeegyada waaweyn ee hoos yimaada qorshaha Daryeelka ee xubnaha Minnesota Senior Care Plus (MSC+). Ma aha liis dhamaystiran oo ah adeegyada

caymiska daboolay. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo fahamka adeegyada la daboolay, wac Adeegga Macmiilka lambarka taleefanka qaybta 1. Adeegyada qaarkood waxay leeyihiin xaddidaadyo. Adeegyada qaarkood waxay u baahan yihiin oggolaansho hamae. Adeeg lagu calaamadeeyay calaamada (*) macnaheedu waa oggolaansho hamae ayaa loo baahan yahay ama waa loo baahan karaa. Hubi in ay jirto oggolaansho hamae kahama inta aanad helin adeegga. Dhammaan adeegyada daryeelka caafimaadku waa inay caafimaad ahaan daruuri u noqdaan si loo daboolo. Ka eeg Qaybta 2 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan oggolaanshaha hamae. Waxaad sidoo kale ka wici kartaa adeegga macaamiisha lambarka taleefanka qaybta 1 wixii macluumaad dheeraad ah.

Adeegyada Daawaynta Maqaarka*

Adeegyada la daboolay:

- Adeegyada daawayneed ee duritaanka maqaarka waxa la daboolaa marka uu bixiyo khabiirka daawayneed ee duritaanka maqaal ee ruqsad haysta ama dhakhtar kale oo Minnesota haysta tababar iyo aqoonsi.
- Adeegyada duritaanka maqaarka waxaa lagu daboolaa kuwa soo socda:
 - xanuunka daran iyo xanuunka raaga
 - walbahaarka
 - werwerka
 - cudurka waalida
 - cudurka walabhaarka ka dambeeya dhibta
 - hurdo la'aanta
 - joojinta cabida sigaarka
 - lugaha aan nasan karin
 - cudurada dhiiga caadada
 - afka oo qalala (afka qalalan) ee la xidhiidha kuwan soo socda:
 - Cudurka idhaha iyo afka oo qala
 - ku daawaynta shucaaca
 - lalabbo iyo matag la xidhiidha kuwan soo socda:
 - nidaamyada qaliinka ka dib
 - uurka
 - daryeelka kansarka

Isku Duwida Daryeelka

Waxaa lagugu qorayaal isku duwe daryeelka ah oo kugu xidhaya adeegyada iyo khayraadka aad u baahan tahay si aad u hesho daryeelka ugu wanaagsan ee macquulka ah. Isku duwaha daryeelku sidoo kale waxa uu kaa caawinayaa inaad wax badan ka ogaato caafimaadkaaga, wixii xaalad caafimaad ee aad qabto, oo waxa uu kaa caawinayaa inaad raacto qorshahaaga taageerada. Isku duwaha daryeelka iyo shaqaalaha Adeega Macmiilka ayaad heli kartaa si ay kaaga jawaabaan wixii su'aalo ah ee aad ka qabto isku duwida daryeelka.

Waxaa kula soo xiriiri doona care coordinator (iskuduwaha daryeelka) 30 maalmood gudahood marka aad u biirto wargelinta. Isku duwaha daryeelka waxa uu ku siin doonaa

qiimayn khatarta caafimaadka ah si loo eego hadii heerka daryeelka aad u baahan tahay iyo adeegyada lagu siin karo.

Isku duwida daryeelka mar kasta waad heli kartaa. Waxa aad joojin kartaa isticmaalka adeegan wakhti kasta adiga oo u sheegaya isku duwaha daryeelkaaga ama la xidhiidhaya Adeega Macmiilka. Hadii aad doonayso inaad bedesho isku duwahaaga daryeelka, waxa aad xarayn kartaa cabasho aad ku dalbanayso isku duwe daryeel oo cusub.

Adeegyada la daboolay:

- Qiimayn lagu eegayo sida isku duwaha daryeelku uu kaaga caawin karo daryeelka caafimaadka, guryaynta, sugitaanka cuntada iyo baahiyaha kale
- Kaaga caawinayo qabsashada balanta, isku dubaridka iyo helitaanka qiimaynaha ama baadhitaanada iyo adeegyada daryeelka caafimaadka sida daryeelka ilkaha, caafimaadka maskaxda iyo balwadaha, dib u dejinta iyo daryeelka kowaad.
- Abuurista iyo cusboonaysinta qorshahaaga daryeelka, oo ku salaysan baahiyahaaga gaarka ah iyo la shaqaynta dadka aad doonto
- Marka aad bixiso ogolaanshaha, isku duwayaasha daryeelka Minnesota Senior Care Plus ayaa la xidhiidhi kara hay'adaha iyo dadka kaa caawin kara inaad buuxiso baahiyahaaga:
 - Kaala shaqeeya adiga iyo dadka kale aad doonto marka isbedel ku yimaado baahiyahaaga daryeelka caafimaadka ama isbitaal dhigista
 - Kaa caawiyo inaad hesho khayraadka aad u baahan tahay ee bulshadaada dhaxdeeda
 - Inaad kala shaqayso maamulaha kiiska Adeegyada Gurigaaga iyo Bulshadaada Ku Salaysan ama maamulayaasha kiisaska ee kale
- Marka aad ka qayb gasho, isku duwayaasha daryeelka ee Minnesota Senior Care Plus ayaa sidoo kale samayn doona kuwa soo socda:
 - Kaa caawiyaan inaad samaysato yoolala caafimaad iyo badqab iyo inay kaaga shaqeeyaan sidii aad u gaadhi lahayd
 - Kuula soo xidhiidhi doonaan ama kuula kulmi doonaan si jooqto ah si ay kaagala hadlaan caafimaadkaaga iyo badqabkaaga
 - Ku xasuusiyaan marka ay tahay inaad ka qayb gasho adeegyada kahortaga, shaybaadhada ama balamaha qayb ka ah qorshahaaga taageerada
- Isku Duwid Adeegyada Daryeelka oo dheeraadka ah:
 - Gunooyinka badqabka, maamulida xanuunka, barnaamijyada waxbarashada bulshada, helitaanka bixiyaha, gaadiidka caafimaadka, kaalmada samaysashada guriga iyo adeegyada ku salaysan bulshada

Oggow:

- Hadii aad qabto su'aalo ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad la xidhiidho isku duwahaaga daryeelka, kala hadal Adeega Macmiilka Minnesota Senior Care Plus lambarka taleefanka ee ku qoran Qaybta 1.

Daryeelka Laf-Bhabarta

Adeegyada La Baboolay:

- Hal qiimayn ama baaritaan sanad kasta
- Hagaajinta gacanta (habaynta) ee lafdhabarta si loo daaweeyo xubnaha laf dhabarta oo kala baxa - ilaa 24 daawaynood sanad kasta, oo ku xaddidan lix bishii. Daawaynta ka badan 24 sanad kasta ama lix bishiiba waxay u baahan yihiin ogolaansho hore.*
- Raajooyinka marka loo baahdo si loo taageero ogaanshaha subluxation ee laf dhabarta Waxaa loo baahan ayahay ama waxaa loo baahan karaa ogolaanshaha marka hore.

Adeegyada Aan La Daboolin:

- Dib u habayn kale, fiitamiinno, agab caafimaad, daawaynta iyo qalabka daaweynta laf-dhabarta

Adeegyada Ilkaha

MUHIIM: Kani maaha liis dhamaystiran. Caymis gaar ah lama dammaanad qaadayo. Xaddidaadyada adeeggu waxa uu khuseeyaa adeegyada ku qoran qaybta adeegyada ilkaha. Adeegyada qaarkood ayaa laga yaabaa inay u baahdaan ama aysan u baahan oggolaansho hore sabab la xiriirta baahida caafimaad. Si aad wax badan uga ogaato adeegyadan, waxaad la xiriiri kartaa Adeegga Macaamiisha.

Adeegyada La Daboolay:

- Adeegyada baaritaanka:
 - baaritaanka iyo qiimaynka afka
 - adeegyada raajada, oo ay ka mid yihiin:
 - Sawirida ilkaha
 - hal raajo si loo ogaado dhibaatooyinka
 - Indha-dhaynta Sawirka
 - raajo afka oo dhamaystiran
- Adeegyada ka hortagga:
 - daweynta xiritaanka godadka ilkaha
 - nadiifinta ilkaha
 - daawaynta suuska ilkaha
 - buuxinta
 - tilmaamaha nadiifinta afka
- Adeegyada buuxinta Ilkaha:
 - buuxinta iliga
 - buuxinta xanun yaraynta ah si loo yareeyo xanuunka
 - iliga saga shakhsi ahaaneed (*ku xaddidan xabagta iyo birta aan mirirka lahayn*)

* Waxay u baahantahay ama u baahan kartaa ogolaansho hore.

- Daaweynta Unugyada ilkaha (godka jirida iliga)
 - habraacyada kale ee ilkaha
- Qaabka walxaha taageeraya ilkaha*:
 - Saarida guud ee huurada iyo daxalka ilkaha (ka saarida unugyada waxyeeloobay afka oo dhan)
 - ka jarida lakabyada guudka iliga iyo soo saarida jirada iliga*
 - Nidaamka la socodka (nadiifinta ilkaha) (*laba sano ka dib ballaarinta iyo beeritaanka xididdada*)
- Samaynta ilko macmal ah:
 - qalab la saari karo (waxyabaha ilkaha lagu xajiyo iyo qaybo ahaan)(*hal qalabdii sanaba mar ilko kasta; qaybaha had iyo jeer u baahan yihiin iskasho hore*)
 - dib u habeynta, wax ka bedelka, dib u hagaajinta, dayactirka, iyo dib ugu celinta booska qalabka la saari karo (qalabka ilkaha lagu xajiyo ilko iyo waxyaabaha lagu xajiyo)
 - bedelida qalabyada ilkaha lagu xajiyo ee lumay, la xaday, ama burburay oo aan la hagaajin karin xaaladaha qaarkood
 - bedelida qalabyada ilkaha lagu xajiyo ee lumay, la xaday, ama burburay oo aan la hagaajin karin xaaladaha qaarkood
 - qalabka hagaajinta unugyada ilkaha
 - ifaaqyada saxda ah iyo dayactirka
- Qaliinka afka*:
 - soo saarista ilkaha
 - soo saarista ilkaha dambe/xigmadda
- Daaweynta lakabka ilkaha*
- Adeegyada kale ee daryeelka ilkaha:
 - daawaynta degdega ah ee xanuunka ilkaha
 - Suuxinta guud, dareen kadilida xeel dheer
 - Xarunta/guriga daryeelka ballaaran, goobaha hay'adaha qaarkood oo ay ku jiraan: guryaha daryeelka la seexo, machadyada cudurada dhimirka (IMD), Xarumaha Daryeelka Dhexdhexaadka ah ee Dadka Naafada ah (ICF/DDs), Xarumaha Nasinta, Xulashooyinka Daaweynta Ballaaran ee Minnesota (Minnesota Extended Treatment Options, METO), Tas-hiilaadka xannaanada, dugsiga ama barnaamijka Head Start, tas-hiilaadka xannaanada xirfadaysan, iyo sariiraha lullidda (sariirta xarunta kalkaalinta ee gudaha isbitaalka)
 - maaraynta habdhaqanka marka loo baahdo si loo xaqiijiyo in adeega ilkaha ee caymiska ku jira si badbaado leh loo fuliyay
 - Naytaras oksaydh (Nitrous oxide)
 - hagaajinta qaniinyada afka
 - suuxdinta afka ama faleebada ah

* Waxay u baahantahay ama u baahan kartaa ogolaansho hore.

Fiiro gaar ah:

Haddii aad doorato in aad dheefaha ilkaha ka hesho Xarunta Caafimaadka ee Aqoonta Dawlada Dhexe (FQHC) ama rugta caafimaadka ilkaha ee ay dawladu maamusho, waxaad heli doontaa isla faa'iidooyinka aad xaqa u leedahay ee hoos yimaada Gargaarka Caafimaadka. Gunooyin dheeraad ah oo ay bixiso UCare kaliya waxaa heli kara bixiyaha daryeelka ilkaha ee ku jira dalada bixiyaha UCare.

Haddii aad ku cusub tahay qorshahayaga caafimaadka oo aad horeba u bilowday qorshaha daawaynta adeegga ilkaha, fadlan nala soo xidhiidh isuduwidada daryeelka.

Tixraac Qaybta 1 ee macluumaadka xiriirka Adeegyada Ilkaha.

Adeegyada baaritaanka

Adeegyada la daboolay:

- Baaritaanada shaybaarka iyo raajada
- Baaritaanada kale oo lagu ogaanayo caafimaadka oo uu dalbado bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga

Fiiro gaar ah:

Shaybaadhka xanuunka waxaa la bixinayaa hadii ay buuxiyaan shuruudaha Medicare ama caymiskeena oo shaybaadhka uu caafimaad ahaan daruuri yahay. Shaybaadh kasta lama bixiyo kharashkiisa.

Adeegyada waxaa lagu bixin karaa xafiiska dhakhtarka, habdhismeedka xarunta caafimaadka, habdhismeedka isbitaalka bukaan socodka, habdhismeedka shaybaadhka madaxa banaan ama shucaaca.

Maamulida Xanuunka

Waxbarshada iyto taageerada si si dhaanta loogu baahdo oo loo maamulo caafimaadkaaga. Ka hel kaalmo maamulida xaaladaada caafimaadka barnaamijiyada Maamulida Xanuunka ee UCare. Waxa aanu bixinaa barnaamijyo kala duwan iyo qaabab loogaga qayb galo taleefanka, qoraal ahaan ama barnaamijyo app-ka taleefanka ah. Waxaa sii dheer, ka qayb gaalayaashu waxay heli doonaan agab ka caawinaya inay samaystaan oo ay gaadhaan yoolashada caafimaadka shakhsi ahaaneed. Bilaw safarkaaga caafimaadka!

Adeegyada La Daboolo:

- **Chronic Obstructive Pulmonary Disease (COPD), Chronic Kidney Disease (CKD), Macaanka, Wadne Xanuunka iyo Migraine Health Coaching (dadka waawayn): Tobobar** caafimaadka shakhsi ahaaneed ah oo taleefanka ah oo lala yeesho tobobaraha caafimaadka oo fahansan xaaladaada iyo sida uu u saamaynayo nololshaada maalinkii. Tobobaraha caafimaadku waxa uu kaala shaqaynayaa samaynta, qiimaynta iyo habaynta yoolashaada caafimaadka. Yoolashada barnaamijku waxaa loogu talo geley sida aad u maamuli lahayd xaaladaada oo aad u hormarin lahad caafimaad qabtaaka iyo

caafimaadkaaga.

- Macaanka: Ku heleysaa Cod Jawaab Celin ah oo Wax La Waydiin Karo ama fariin qoraal ah oo waxbarashada macaanka ah taleefankaaga. Dhamayso IVR-kaaga ama akhri fariintaada waxbarashada wakhtiga kuu haboon adiga!
- **Badqaka guud, macaanka, kacsanaanta wadnaha ama xaaladaha kale ee caafimaad ee mudada dheer jira:** Maamulida badqabkaaga guud, macaankaaga iyo/ama dhiikarkaaga adiga oo adeegsanaya taleefankaaga ay ku jiraan waxbarashada iyo xasuusinta si ay kaaga caawiso inaad maamulida caafimaadkaaga. App-ku waxa uu kuu sahlayaa inaad la sheekeysato dhakhtarka macaanka iyo khabiir caafimaad markaas si aad u hesho taageerada aad u baahan tahay, marka aad u baahan tahay.

Fiiro gaar ah:

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijyadan, booqo [ucare.org/healthwellness](https://www.ucare.org/healthwellness) ama kala hadal Kooxda Maamulida Xanuunka UCare 866-863-8303 (taleefanka waa bilaash). Ama kala hadal lambarka TTY ee 800-688-2534 (lambarka waa bilaash).

Dhakhtarka iyo Adeegyada kale ee Caafimaadka

Adeegyada la daboolay:

- Booqashada dhakhtarka oo ay ku jiraan:
 - baaritaanka xasaasiyadda iyo baaritaanka xasaasiyadda
 - daryeelka dadka uurka leh
 - qorshaynta qoyska – **helida adeega furan**
 - baadhitaanada shaybaadhka iyo Raajada
 - baadhitaanka jidhka
 - baadhitaanka ka hortagga ah
 - booqashooyinka xafiiska ka hortagga
 - dhakhtarada takhasuska ah
 - la talinta daawaynta telfoonka ah
 - tallaalada iyo daawooyinka lagu bixiyo xafiiska daryeel bixiye caafimaad ee aqoonta u leh*
 - booqashooyinka jirro ama dhaawac ahaaneed
 - booqashooyinka isbitaalka ama guriga daryeelka
- Ku dhaqanka hamae adeegyada kalkaalisada: adeegyada ay bixiso kalkaalisada dhaqtarka, kalkaalisada suuxinta, kalkaalisada umulisada, ama kalkaalisada takhasuslaha caafimaadka
- Guriga Caafimaadka Dhaqanka: isku xidhka daryeelka koowaad, adeegyada caafimaadka maskaxda iyo adeegyada bulshadda
- Dhiiga iyo waxyaabaha ku jiraan dhiiga

* Waxay u baahantahay ama u baahan kartaa ogolaansho hore.

- Cayminta tijaabada caafimaad: Daryeelka joogtada ah ee ah: 1) lagu bixiyo qayb ka mid ah daawaynta borotokoolka ee Tijaabada Caafimaad; 2) waa caadi, caado iyo ku haboon xaaladaada; iyo 3) sida caadiga ah waxaa lagu bixiyaa meel ka baxsan Tijaabada Caafimaadka. Tan waxa ku jira adeegyada iyo agabka loo baahan yahay saamaynta daawaynta iyo dhibaatooyinka bamaotokoolka daawaynta.
- Baaritaannada kansarka (ay ku jiraan baaritaanka kansarka naaska, baaritaanka kansarka xubinka taranka haweenka, baarista kansarka qanjirka shahwa mareenka, baaritaanka kansarka mindhicirka)
- Adeegyada caafimaad ahaaneed
- Isuduwidda daryeelka shaqaalaha caafimaadka bulshada iyo adeegyada waxbarashada bukaanka
- Adeegyada Farsamoyaqaanka Degdegga ah ee Caafimaadka Bulshada (CMET)
 - booqashooyinka ka bixista guriga ee ka dambeeya isbitaalka/xanaanada ka dib ee uu amray bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga
 - booqashooyinka qiimaynta badbaadada ee uu amray Bixiyaha/Dhakhtarka Daryeelka Koowaad (PCP)
- Adeegyada Dhakhaatiirta Bulshada: adeegyada qaarkood waxaa bixiya kalkaaliye caafimaad. Adeegyadu waa inay ahaadaan qayb ka mid ah qorshaha taageerada ee bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga. Adeegyada waxaa ku jiraa :
 - qiimaynta caafimaadka
 - la-socodka iyo waxbarashada cudurrada daba-dheeraada
 - ka caawinta daawaynta
 - tallaalka iyo tallaalada
 - ururinta shaybaadhka
 - daryeelka la socodka ah ka dib markii lagu daaweeyay isbitaal
 - nidaamyada kale ee yar ee caafimaadka
- La-talinta iyo baaritaanka cudurrada galmada lagu kala qaado (STDs), AIDS ka iyo xaaladaha kale ee la xiriira HIV– **adeegyada helitaanka furan**
- Adeegyada Guriga Daryeelka Caafimaadka: isuduwidda daryeelka ee xubnaha leh baahiyaha daryeel caafimaad oo adag ama dabadheer
- Waxbarashada caafimaadka iyo la-talinta (tusaale ahaan, joojinta sigaarka, la-talinta nafaqada, waxbarashada sonkamaowga)
- Isuduwidda Adeegga Bulshada ku meel-gaadhka ah ee isbitaalka (IRSC): isuduwidda adeegyada lagu beegsanayo dhimista qolka gurmada ee isbitaalka (ER) ee xaaladaha qaarkood. Adeegani wuxuu wax ka qabtaa caafimaadka, bulshada, dhaqaalaha, iyo baahiyaha kale ee xubnaha si loo yareeyo isticmaalka ER iyo adeegyada kale ee daryeelka caafimaadka.
- Talaaladda
- Adeegyada caafimaadka lugaha (dirid cidiyaha suulasha, maqaarka iyo haraga caabuuq qaba, iyo daryeelka cagaha kale ee aan joogtada ahayn)

- Daaweynta neefsashada
- Adeegyada kalkaalisada caafimaadka dad weynaha ama kalkaalisada diiwaangashan oo ku tababaranaysa rugta caafimaadka dadweynaha ee hoos timaada qayb dawladeed
- Daaweynta AIDS iyo xaaladaha kale ee la xidhiidha HIV – **AAN** ahayd adeega helida furan. Waa inaad isticmaashaa bixiye ku jira shabakada Qorshaha
- Daawaynta Cudurka Kelyaha ee Marxaladda Ugu dambaysa (ESRD)
- Daaweynta cudurada galmada lagu kala qaado (STDs) – **adeeg furan oo la heli karo**
- Maaraynta daryeelka qaaxada iyo kormeerka tooska ah ee qaadashada daawada

Adeegyada Aan La Daboolin:

- Siyaabaha macmalka ah ee aad uur u yeelan karto (Shahwo gelinta makaanka, oo ay ku jiraan bacriminta shahwada iyo adeegyada la xidhiidha, daawooyinka dhalmada iyo adeegyada la xidhiidha)

Adeegyada Caafimaadka Degdega ah iyo Daryeelka Xasilinta Kadib

Adeegyada la daboolay:

- Adeegyada qolka gurmada
- Daryeelka degnaanshaha ka dambeeya
- Ambalaas (hawada ama dhulka waxaa ku jira gaadiidka biyaha)

Adeegyada Aan La Daboolin:

Xaalad gurmada, degdeg ah, ama adeegyo kale oo daryeel caafimaad oo la keeno ama alaabta laga helo bixiyeyaasha ku yaal meel ka baxsan Maraykanka (US). Ma bixin doono kharashka daryeelka caafimaadka bixiyaha ama cid kasta oo ka baxsan Maraykanka

Fiiro gaar ah:

Hadii aad qabto xaalad degdeg ah oo aad isla markiiba u baahan tahay daawayn, wac 911 ama isticmaal qolka gurmada degdega ee kuugu dhow. Tus kaarkaaga aqoonsiga xubinnimada oo u sheeg inay wacaan daryeel bixiyahaaga caafimaad ee adeeg bixiyaha.

Dhamaan kiisaska kale, wac bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga, hadii ay suurtagal tahay. Waxaad wici kartaa lambarka 24 saac maalintii, toddobada maalmood ee usbuuca waxaadna heli kartaa tilmaamo ku saabsan waxaad samaynayso.

Haddii aad ka maqan tahay magaalada, aad qolka gurmada ee kuugu dhow ama wac 911. Tus kaarkaaga aqoonsiga xubinnimada oo u sheeg inay wacaan daryeel bixiyahaaga caafimaad ee adeeg bixiyaha.

Waa inaad gudaha u wacdaa bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga 48 saacadood ama sida ugu dhakhsaha badan ee aad awoodid ka dib markaad hesho daryeelka degdega ah isbitaal aan ka mid ahayn shabakada Qorshaha.

Adeegyada Kala Fogaynta Dhalmada

Adeegyada la daboolay:

- Baaritaanka kala fogaynta dhalmada iyo daaweynta caafimaad – **adeeg furan oo la heli karo**
- Shaybaarka kala fogaynta dhalmada iyo baaritaannada ogaanshaha cudurka – **adeeg furan oo la heli karo**
- Qaababka kala fogaynta dhalmada (tusaale ahaan, kaniiniyada ka hamatagga uurka, balaastar, giraan, Aalada makaanka la geliyo (IUD), irbado, birta gacanta la gashado) – **adeeg furan oo la heli karo**
- Agabyada Kala fogaynta dhalmada oo leh warqad dhakhtar (tusaale, kondhom, isbuunyo, xumbo, khafiif, xuub, fur) – **adeeg furan oo la heli karo**
- La-talinta iyo ogaanshaha dhalmo la'aanta, oo ay ku jiraan adeegyada la xidhiidha – **adeeg furan oo la heli karo.**
- Daaweynta xaaladaha caafimaad ee dhalmo la'aanta – **MA AHAN** adeeg helitaankiisu furan yahay. Waa inaad isticmaashaa bixiye ku jira shabakada Qorshaha.

Fiiro gaar ah: Adeegan kuma jiraan habab macmal ah oo aad uur ku yeelan karto..

- La-talinta iyo baaritaanka cudurrada galmada la isku qaadsiiyo (STDs), AIDS-ka, iyo xaaladaha kale ee la xiriira HIV – **adeeg furan oo la heli karo**
- Daaweynta cudurada galmada lagu kala qaado (STDs) – **adeeg furan oo la heli karo**
- Dhalmo iska joojinta ikhtihaariga ah – **adeeg furan oo la heli karo**
Fiiro gaar ah: Waa inaad tahay 21 jir ama ka weyn waana inaad saxiixdaa foomka ogolaanshaha dhalma joojinta ee federaalka Ugu yaraan 30 maalmood, laakiin aan ka badnayn 180 maalmood, waa inay dhaafaan inta u dhaxaysa taariikhda aad saxeexday foomka iyo taariikhda qalliinka.
- La talinta hide-sidaha – **adeeg furan oo la heli karo**
- Baadhitaanka hida sidaha – **AAN AHAYN** adeegyada helitaankoodu furan yahay. Waa inaad isticmaashaa bixiye ku jira shabakada Qorshaha.
- Daaweynta AIDS iyo xaaladaha kale ee la xidhiidha HIV – **AAN** ahayd adeega helida furan. Waa inaad isticmaashaa bixiye ku jira shabakada Qorshaha.

Adeegyada Aan La Daboolin:

- Siyaabaha macmalka ah ee uur lagu yeelan karo (ku shubitaanka manida ragga, oo ay ku jiraan bacriminta vitro iyo adeegyada la xiriira, daawooyinka bacriminta iyo adeegyada la xiriira)
- Dib u celinta jeermiska iskiis ah
- Madhalaysnimada qof ku hoos jira ilaalinta/masuuliyadiisa la hayo

Fiiro gaar ah:

Sharciga dawladda federaalka iyo kan gobolka ayaa kuu ogolaanaya inaad doomaato dhakhtar, rug caafimaad, isbitaal, farmashiye, ama wakaaladda kala fogaynta dhalmada si aad u hesho **adeeg furan oo la heli karo**, xitaa hadii aysan ku jirin shabakadda qorshaha.

Barnaamijyada Caafimaadka iyo Badqabka

Xubnaha u qalma, UCare waxa uu bixiyaa hormar caafimaadkaaga iyo badqabkaaga ah.

Adeegyada La Daboolo:

- Strong and Stable Kit oo leh xog iyo qalabyo lagu kordhinayo dheelitirka loogana hortagayo dhicitaanka. Weydii care coordinator (iskuduwaha daryeelkaaga) qalabka. U qalma hal qalab sannadkiiba.
- Hel gunno saddexdii biloodba mar ah oo lagugu shubayo kaadhkaaga Healthy Benefits+ Visa* Si aad ugu isticmaashid inta badan fasalada waxbarashada ee wadanka oo dhan ka jira. Si aad u doorato, wac Adeegga Macaamiisha.

Gunnadu waxay dhacaysaa dhamaadka afar-bilood ama marka qorshaha la joojiyo. Kaadhku ma shaqayn doono haddii aadan hadda xubin ka ahayn UCare. UCare ma awoodo inay magdhow ka bixiso fasalada lacagtooda la bixiyo iyadoon la isticmaalin kaarka Healthy Benefits+.

- Hel qiimo dhimis ku aadan cuntooyinka caafimaadka leh ee hore loo qo'aamiyay. Waxaana ka mid ah waxyaabaha ay ka mid yihiin caanaha, rootiga aan badarka lahayn, hilibka aan caatada ahayn, ukunta, caano fadhi/yooghat, miraha, khudaarta iyo in kaloo badan. Sicir-dhimista toddobaadlaha ah ayaa horay loogu sii shubay kaarka UCare Healthy Benefits+ Visa®. Si aad wax badan uga ogaato oo aad u codsato kaarka booqo HealthyBenefitsPlus.com/ucare ama wac 1-833-862-8276 (wacitaankani waa bilaash) ama TTY, 711 (wacitaankani waa bilaash).
- Ku xirnow ilaha cuntada deegaanka iyada oo loo marayo Second Harvest Heartland Care Center. Xubnuhu waxay wici karaan xarunta si looga caawiyo codsashada gunnooyinka SNAP iyo ka helidda ilaha cuntada ee deegaankooda, oo ay ku jiraan khaanadaha cuntada, Fare for All iyo in kale oo badan.

Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir Second Harvest Heartland adiga oo wacaya 651-401-1411 ama 1-866-844-FOOD (wacitaanku waa bilaash) ama iimayl u diraya SHHCareCenter@2harvest.org.

Fiiro Gaar ah:

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijyadan, gal ama samayso xisaabtada xubinta ah ee member.ucare.org. Qabo Caafimaadka iyo Badqabka, Kadibna Badqabka, Abaalmarinta & Gunada si aad macluumaad dheeraad ah uga ogaato. Waxaad booqan kartaa sidoo kale ucare.org/healthwellness ama kala hadal Adeega Macmiilka Ucare 612-676-3200 ama 1-800-203-7225 (taleefan waa bilaash), 8 subaxnimo – 5 galabnimo, Isniin – Jimce. Ama la hadal lambarka TTY oo kala hadal 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (taleefanka waa bilaash ah).

Aaladaha Maqalka

Adeegyada la daboolay:

- Baytariyada Aaladaha Maqalka
- Aaladaha Maqalka
- Dayactirka iyo beddelka qalabka gargaarka maqalka sababtoo ah dhoqashada iyo jeexjeexa caadiga ah, iyada oo xaddidan

Adeegyada Daryeelka Guriga

Adeegyada la daboolay:

- Booqashada kalkaaliye xirfadaysan
- Daaweynta baxnaaninta si loo soo celiyo shaqada (tusaale, hadalka, jirka, shaqada, neefsashada)
- Booqashada kaaliyaha caafimaadka guriga
- Kalkaaliyaha Daryeelka Guriga (HCN)*
- Waxaa laga yaabaa in loo baahdo ama aanan loo baahan oggolaansho hore.
- Kaaliyaha Daryeelka Shakhsi ahaaneed (PCA). (Adeegyada Koowaad iyo Taageerada Bulshada (CFSS) waxay beddelayaan adeegyada PCA, markay ogolaato dawladda federaalka)*

Adeegyada Ku Salaysan Guriga iyo Bulshada (Ka Dhaafista Waayeelka)*

Adeegyada la daboolay:

Qorshuhu wuxuu bixin doonaa adeegyada soo socda shaqsiyaadka u qalma inay helaan adeegyada Ka dhaafitaanka Waayeelka (EW):

- Adeegyada Saaxiibka: Daryeelka aan caafimaadka ahayn, kormeerka iyo bulshada la jooga.
- Adeegyada Maalinta Dadka Waaweyn (ADS) iyo Qubayska ADS: Barnaamij shatiga shakhsi ahaaneed ee hawlaha lagu buuxinayo baahiyaha caafimaadka iyo bulshada ee la qiimeeyay ee ruuxa waayeelka ah. Qubayska ADS waa ikhtiyaari. Sidoo kale waxaa ku jira Adeegyada Malainta Oyska ofka wayn (FADS).
- Daryeelka Korinta Dadka Waaweyn: Shaqsi haysta, qaangaar ah oo ku habboon, daryeelka meesha lagu nool yahay iyo adeegyada taageero oo ku yaal goob goys oo kale ah.
- Maareynta Kiiska: Maareynta caafimaadkaaga iyo adeegyada daryeelka muddada-dheer ee shaqaalaha kala duwan ee caafimaadka iyo xirfadlaha adeegga bulshada.

* Waxay u baahantahay ama u baahan kartaa oggolaansho hore.

- Adeegyada Shaqada: Adeegyada guriga ee culus ayaa loo baahan yahay si gurigaaga looga dhigo mid ammaan ah.
- Adeegyada Taageerada Bulshada Ku Hagayo Macmiilka: Adeegyada aad nashqadayso ee buuxiya baahiyahaaga iyo naftaada ku maamusho miisaaniyad go'an.
- Nolol Habboon/24 Saac Nolol Habboon: Koox ka mid ah adeegyada gaarka ah (la xidhiidha caafimaadka iyo adeegyada la taageero) oo lagu bixiyo goobta loo qalmo.
- Laqabsiga Helitaanka Deegaanka: Isbeddelka jirka ee gurigaaga iyo gaarigaaga ayaa loo baahan yahay si loo xaqiijiyo caafimaadka iyo badbaadada oo laguugu suurtageliyo inaad madax banaanaato. Tan waxaa ku jira qiimaynta guriga ama wax ka beddelka baabuurka.
- Qorshaha Gobolka ee Dheeraadka ah Adeegyada Daryeelka Caafimaadka Guriga: Tan waxaa ku jira adeegyada kaalmada caafimaadka guriga ee ka sarreeya xadka Caawinta Caafimaadka.
- Kalkaaliyaha Daryeelka Guriga Qorshaha Gobolka ee Dheeraaday: Tan waxa ku jira adeegyada daryeelka guriga ee ka sarreeya xadka Caawimada Caafimaadka.
- Qorshaha Gobolka La Kordhiyay Adeegyada Kaalmada Daryeelka Gaarka ah (PCA) (Adeegyada Koowaad ee Bulshadda iyo taageerooyinka (CFSS) waxay beddeshaa adeegyada PCA marka Gobolka Minnesota uu helo oggolaanshaha Federaalka si loo bixiyo adeegyada): Kaalmada daryeelka gaarka ah iyo hawlaha nololaha maalinlaha ah (ADLs) ee xadka Kaalmada Caafimaadka. PCAs waxay sidoo kale kaa caawin karaa hawlaha qalabka nololaha maalin laha ah (IADLs).
- Qoyska iyo Adeegyada Daryeel Bixiyaha: Tababarka, waxbarashadda, tababarka iyo la talinta daryeel bixiyayaasha aan lacagta la bixin. Tan waxaa ka mid ah tababarka daryeel bixiyaha, iyo la talinta daryeel bixiyaha.
- Cuntooyink Guriga Loo soo diro: Cunto habboon, nafaqo leh oo dheeli tiran oo gurigaaga laguugu soo diro.
- Adeegyada Guriga: Adeegyada kaa caawiyanaaya inaad maamusho nadaafada guud iyo hawlaha qoyska.
- Adeegyada Taageerada Nololaha ee Bulshada: Adeeg isku dhafan oo lagu bixiyo gargaar iyo taageero si aad ugu sii jirto gurigaaga ay ku jirto xusuusinta, ishaarida, kormeerka wakhti u kala dhexeeyo ama kaalmada jidhka.
- Daryeelka Nasiinada: Adeegga muddada-gaaban marka aadan naftaada daryeeli karin, iyo daryeelahaaga aan mushaarka la siin uu u baahan yahay gargaar.
- Qalab iyo Agabka Gaarka ah: Alaabta iyo qalabka ka sarreeya xadka ama caymiska Caawimada Caafimaadka ama aan qayb ka ahayn Kaalmada daboolida kale ee Caafimaad laakiin lagu caddeeyay qorshaha taageeradaada. Tan waxa kamid ah Nidaamka Ka Jawaabida Xaaladda Degdegga ah ee Shakhsi ahaaneed (PERS).
- Adeegyada Taageerooyinka Kala guurka ah: sheeyada iyo taageerooyinka alama huraanka waxay ka tagaan goobta ruqsada haysata ilaa mid madax banaan ama bulshadda qayb ahaan madax banaan guriyaynta bulshadda ku salaysan.

- Gaadiidka: Waxay kuu sahlaysaa inaad hesho hawlaha iyo adeegyada bulshada dhexdeeda.

Fiiro gaar ah:

Waa in lagu sameeyaa qiimaynta MnCHOICES (oo hore loogu yiqiin La-talinta Daryeelka Muddada Dheer (LTCC)) oo lagu ogaado inaad tahay qof la aqoonsanyahay in ku jira daryeelka guriga si aad u hesho adeegyadan Ka-dhaafitaanka Waayeelka (EW). Waxaad waydiisan kartaa inaad ku qaadato qiimayntan gurigaaga, dabaqa, ama xarunta halka aad ku nooshahay. Isku-duwahaaga daryeelka MSC+ ayaa kula kulmi doona adiga iyo qoyskaaga si uu ugala hadlo baahiyahaaga daryeelka 20 maalmood gudahooda haddii aad soo wacdo si aad u codsato booqasho.

Isku duwaha daryeelkaaga MSC+ ayaa ku siin doona macluumaadka ku saabsan adeegyada bulshada, kaa caawin doona inaad hesho adeegyo aad ku dhex joogto gurigaaga ama bulshadaada, oo ku caawin doona inaad hesho adeegyo aad uga gurto guriga kalkaalinta ama xarun kale.

Waxaad xaq u leedahay inaad saaxiibo ama qoys ku yeelato booqashada. Waxaad magacaabi kartaa wakiil kaa caawiya inaad go'aamo samayso. Adiga ayaa go'aansan kara waxa baahidaadu tahay iyo meesha aad rabto inaad ku noolaato. Waxaad waydiisan kartaa adeegyada sida ugu wanaagsan u dabooli kara baahiyahaaga. Waxaad samayn kartaa go'aannada ugu dambeeya ee ku saabsan qorshahaaga adeegyada iyo caawinta. Waxaad dooran kartaa cidda aad rabto inaad bixiso adeegyada iyo taageerada bixiyeyaasha laga heli karo shabakada Qorshaha.

Booqashada kadib, isuduwaha daryeelkaaga MSC+ ayaa kuu soo diri doona warqad ku talinaysa adeegyada sida ugu fiican u daboolaya baahiyahaaga. Waxa lagu soo diri doona koobiga adeega ama qorshaha daryeelka ee aad gacan ka gaysatay isku geynta. Isku duwaha daryeelkaaga MSC+ ayaa kaa caawin doona inaad xeraysato racfaan haddii aadan ku raacsanayn adeegyada la soo jeediyay ama lagu wargeliyay inaad u qalmin adeegyadan.

Xubnaha aan u qalmin ama weli la sugayo qiimaynta ka tanasulka, qorshaha waxa uu bixin karaa adeegyada si looga caawiyo xubinta inay ku noolaato nolol madax banaan ilaa inta la awoodo.

Dadka ku nool ama ku nool meel u dhaw White Earth, Leech Lake, Red Lake, Mille Lacs or Fond du Lac Reservations waxa laga yaabaa inay awoodaan inay doortaan inay helaan adeegyadooda EW iyaga oo u maraya qaybta caafimaadka dadka dhaladka ah ama qeybta adeegyada bini'aadmiga ama qorshahayaga.

La xiriir dadka u dhashay ama Qorshahayaga haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Haddii aad hadda ku jirto Helitaanka Bulshada ee Isku-Darka Naafada (CADI), Daryeelka Badelka ah ee Bulshada (CAC), Dhaawaca Maskaxda (BI), ama dhaafitaanka Naafada Koriinka (DD), waxaad sii wadi doontaa inaad hesho adeegyada ay daboolaan barnaamijyadan isla si isku mid ah. sida aad hadda u hesho. Maamulaha kiis ee degmadaada wuu sii wadi doonaa inuu oggolaado adeegyadan oo la xiriir isku-duwaha daryeelkaaga MSC+.

Haddii aad u baahan tahay qorshaha kala guurka iyo adeegyada isku duwida si loo caawiyo adigu inaad u soo gurto bulshadda, waxaad u qalmi kartaa inaad hesho Guriga Socda adeegyada (MHM). Adeegyada MHM waa ka gooni adeegyada ka yimid EW, laakiin waa inaad u qalanto EW.

Tixraac Adeegyada Ku salaysan Guriga iyo Bulshada ee Qaybta 1 wixii macluumaadka xiriirka ah.

Guriga daryeelka dadka jirran

Adeegyada la daboolay:

Dheefaha daryeelka guriga waxaa ka mid ah caymiska adeegyada soo socda, marka si toos ah loo bixiyo iyadoo laga jawaabay cudurka halis ah:

- Adeegyada dhakhtarka
- Adeegyada kalkaaliska
- Adeegyada bulshada caafimaadka
- Latalinta
- Qalabka iyo agabka caafimaadka
- Daawooyinka bukaan-socodka ee calaamadaha iyo xakamaynta xanuunka
- Cunto iyo latalin kale
- Daryeelka bukaan-jiif mudda gaaban
- Daryeelka nasiinada
- Kaaliyaha caafimaadka guriga iyo adeegyada guri hagaajiyaha
- Daaweynta jirka, shaqada, iyo hadalka
- Tabaruceyaal
- Alaabooyinka iyo adeegyada kale ee ku jira qorshaha daryeelka kuwaas oo ah adeegyada caafimaad oo la daboolay

Fiiro gaar ah:

Doorashada Medicare

Waa inaad doomaataa dheefaha daryeelka guriga si aad u hesho adeegyada daryeelka guriga.

Haddii aad u qalanto Medicare iyo Medicare Assistance (Kaalmada Medicare) oo aad doorato Adeegga Nasinta, waa inaad doomaataan daryeelka hospice-ka ee Medicaid marka lagu daro daryeelka guriga Medicaid. Xeerarka federaalku waxay kaa mamnuucayaan inaad ku doomaato daryeelka guriga ee halka barnaamij ah ee maaha midka kale markaad u qalanto labadaba.

Haddii aad xiisaynayso isticmaalka adeegyada daryeelka guri, Fadlan wac Adeega Macmiilka lambarka talefoon ee ku yaala qeybta 1.

Isbitaalka - Bukaan-jiif

Adeegyada la daboolay:

Adeegyada isbitaalka bukaan-jiifka waa la daboolaa haddii la go'aamiyo inay caafimaad ahaan lagama maarmaan u yihiin. Tani waxaa ka mid ah:

- Joogitaanka bukaanka cusbitaalka*
- Qolkaaga xoogaa ku gaar ah iyo cuntooyinka
- Qol gaarka ah marka caafimaad ahaan loo baahdo
- Baaritaano iyo raajada
- Qaliin*
- Daawooyin
- Qalabka caafimaadka
- Adeegyada xirfadeed
- Adeegyada daawaynta (tusaale ahaan, jirka, shaqada, hadalka, neef-mareenka)

Adeegyada Aan La Daboolin:

- Alaabooyinka raaxada gaarka ah, sida telefeeshin, taleefanka, timo-jaraha ama adeegyada qurxinta, adeegyada martida
- Kharashyada la xidhiidha daryeelka cisbitaalka ee adeegyada baadhista, qaliinka balaastikada ah, ama qalliinka qurxinta lama daboolo ilaa la go'aamiyo caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah habka dib u eegista caafimaadka

Waxa uu u baahan yahay ama u baahan karaa ogolaanshe hore.

Fiio gaar ah:

Macluumaadka dheeraadka ah ee noocyada kala duwan ee dhigitaanka bukaan jiiifka ay ku jirto bukaan jiiifka caafimaadka maskaxada ama cudurka isticmaalka maandooriyaha (SUD), fadlan tixraac qaybaha gaarka ah ee buug yarahan xubinta.

Daryeelka aan degdega ahayn ee lagu helo cusbitaalka waxa uu u baahan karaan oggolaanshe hore. Kala shaqeyso bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga si aad u hesho oggolaansho hamae marka loo baahdo. Waxaad sidoo kale ka wici kartaa adeegga macaamiisha lambarka taleefanka qaybta 1 wixii macluumaad dheeraad ah.

Isbitaalka - Bukaan socodka

Adeegyada la daboolay:

- Daryeelka degdega ah ee xaaladaha aan si degdega ah u darnayn
- Xarunta qaliinkal bukaan socodka
- Baaritaano iyo raajada
- Kalyo dhaqida
- Adeegyada qolka gurmada

* Waxay u baahantahay ama u baahan kartaa oggolaansho hore.

- Daryeelka degnaanshaha ka dambeeya
- Adeegyada indho-indheynta - haddii aan lagu dhigin bukaan-jiif ahaan isbitaalka, waxaad geli kartaa heerka "indho-indhaynta bukaan-socodka" ilaa uu bixiyahaagu go'aamiyo in xaaladdaadu u baahan tahay in bukaan-jiif la seexiyo isbitaalka ama guriga laga saaro. Adeegyada indho-indheynta waxa la daboolaa ilaa 48 saacadood. UCare waxay tixgelin doontaa adeegyada fiirsashada ilaa 72 saacadood xaalado aan caadi ahayn marka lagu soo gudbiyo dukumeenti dheeraad ah.

Fiio gaar ah:

Daryeelka aan degdega ahayn ee lagu helo cusbitaalka waxa uu u baahan karaan oggolaanshe hore. Fadlan la shaqeyso bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga si aad u hesho oggolaansho hamae marka loo baahdo. Waxaad sidoo kale ka wici kartaa adeegga macaamiisha lambarka taleefanka qaybta 1 wixii macluumaad dheeraad ah.

Adeegyada Dejinta Guryaha*

Adeegyada la daboolay:

Qorshuhu wuxuu bixinayaa adeegyada soo socda xubnaha u qalma Adeegyada Dejinta Guryaha:

- Adeegyada la talinta guryeynta si loo hamaumariyo Qorshe qofka ku wajahan dadka aan lahayn adeegyada maaraynta kiisaska Caawimada Caafimaadka
- Adeegyada kala guurka guriyeynta si ay kaaga caawiyaan qamashaynta, helitaanka, iyo u guurista guryeynta
 - Kala guurka guryaynta – kharashka guurista (waxa uu ku xadidan yahay ilaa \$3000 sanadkii)
 - Kaliya dadka ka guuray xarunta lagu maalgeliyo Kaalmada Caafimaadka ama habdhismeedka uu maamuli biixyaha oo guri u gaar ah u guuraysa
 - Arjiyada, deebaajiga, iyo kharashka waraaqaha amaanka ah ee loogu baahan yahay kirada guriga ama guriga ku yaala dabaqa
 - Alaabta guriga ee daruuriga ah ee loogu baahan yahay nolosha oo loo adeegado guriga, oo waxaa kamid ah alaabta guriga, daaha guriga, shayada cuntada lagu diyaariyo, iyo go'yaasha sariiraha ama tuwaalada
 - Kharashka soo furashada ama deebaajiga adeegyada ama helitaanka adeega, oo waxaa kamid ah taleefanka, laydhka, kulayliyaha iyo biyaha
 - Adeegyada daruuriga u ah caafimaadka iyo amaanka shakhsiga sida bayayaan bufinta iyo nadiifinta halmar kahor inta aan la guurin
 - U diyaarinta guriga qaab ruuxa degan uu soo geli karo
- Adeegyada joogtaynta guryaynta oo kaa caawinaysa inaad joogtayso guryayntaada

* Waxay u baahantahay ama u baahan kartaa oggolaansho hore.

- Gaadiidka Adeegyada Xasilinta Guryaha marka adeeg-bixiyaha uu baahiyaha la xiriira guryeynta kala xaajoonayo xubinta isago oo gaari wado. Waqtigaan waxaa loo dallaci karaa sidii yunitka kala-guurka/waditaanka ahaan. Masaafada magdhow ma lahan.

Lama Daboolin:

Qorshaha ma bixin doono:

- Lacagta kirada ama daynta guriga
- Cuntada
- Dharka
- Shayada kaafidaysiga, oo waxa akamid ah aalada baahinta tooska ah, kombuyuutaro, taleefano, telefiishinka kriada ah, sameecado iyo wixii la hal maala
- Shay kasta, kharashaadka ama taageerada badinta wixii waraaqo ah ee adeegyada kale ama uu leeyahay ama uu kireeyay bixiyuhu

Fiiro gaar ah:

Waa in lagu sameeyo qiimayn si loo ogaado inaad u qalanto Adeegyada Xasillinta Guryaha. Haddii aad leedahay maareeye kiis oo la beegsaday ama maareeyaha kiiska wayfarka, waxaad waydiisan kartaa caawimaad si aad u ogaato inaad u qalanto Adeegyada Xasillinta Guryaha. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa bixiyaha Adeegyada Xasilinta Guryaha si ay kuu caawiyaan.

Waaxda Adeegyada Dadweynaha (DHS) ayaa dib u eegi doonta qiimaynta si ay go'aan uga gaarto haddii aad u qalanto Adeegyada Xasilinta Guryaha. DHS waxay kuu soo diri doontaa warqad ku saabsan inaad u qalanto Adeegyada Xasillinta Guryaha. Haddii aad u qalanto, warqaddu waxay kuu sheegi doontaa in adeegyada lagu oggolaaday. Haddii aadan u qalmin, warqaddu waxay kuu sheegi doontaa in adeegyada lagu diiday.

La shaqeey adeeg-bixiyahaaga haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo kharashyada guuritaanka. Haddii lagu oggolaado kharashyada guuritaanka, adeeg-bixiyahaagu waa inuu noo soo diraa risiidhka kharash kasta oo guuritaan la xiriira.

Adeegyada Turjubaanka

Adeegyada la daboolay:

- Adeegyada turjubaanka luqadda lagu hadlay
- Adeegyada turjubaanka luqadda dhegoolaha

Fiiro gaar ah:

Adeegyada turjubaanka ayaa diyaar ah si ay kaaga caawiyaan bixinta adeegyada.

Tixraac Adeegyada Turjubaanka ee Qaybta 1 si aad u hesho macluumaadka xiriirka iyo si aad u ogaato turjumaanada aad isticmaali karto.

Qalabka aafimaadka iyo Saadka*

Adeegyada la daboolay:

- Qeyb jirka oo macmal ah ama lafaha
- Qalab caafimaad oo waara (tusaale ahaan, kuraasta curyaamiinta, sariiraha isbitaalka, lugeeyayaasha, biraha curyaanka, birta la qabsato, qalabka maydhiga iyo suuliga, iyo timaha macmalka ah ee dadka qaba timo waayida xaalad caafimaad oo kalsta). La xidhiidh Adeegga Macmiilka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caymiska iyo xadka faa'iidooyinka ee timaha macmalka ah.
- Dayactirka qalabka caafimaadka
- baytariyada qalabka caafimaadka
- Kabaha qaar, waxaa kamid ah kaba shirabaada caafimaadka marka shuruudaha qaar la buuxiyo iyo marka caadi ahaan loo qaabeeyo ama qayb ka mid ah faashada lugta
- Ogsajiinta iyo qalabka ogsajiinta
- Aaldaha nadiifihya hawo mareenka
- Aaladaha maaxinta elektorooniga ah
- Agab caafimaad oo aad u baahan tahay si aad u daryeesho jirradaada, dhaawacaaga ama naafadaada
- alabka sonkorta iyo saadka
- Alaabooyinka nafaqeynta/calool mareenka ah, marka shuruudo gaarka ah la buuxiyo
- Alaabooyinka kaadida-celiya
- Agabka qorsheynta qoyska – **adeegyada helitaanka furan**. (Tixraac Adeegyada Qamashaynta Qoyska ee qaybtan.)
- Aaladaha isgaarsiineed ee kordhiya, oo ay ku jiraa taableedyada korontada ku shaqeeya
- Aaladaha la socodka suuxinta

Adeegyada Aan La Daboolin:

- Waxka bedelka dhismaha ee guriga, gaadiidka, ama goobta shaqada, oo ay ku jiraan biraha qabsashada musqusha qubayska
- Alaabooyinka deegaanka (sida sifeeyaha hawada, nadiifiyeyaasha, qaboojiyaha, qalajiyaha)
- Qalabka jimicsiga

Fiiro gaar ah:

Waxaad u baahan doontaa inaad isticmaasho daryeel bixiyahaaga caafimaad ee aqoonta lehoo aad hesho warqad dhakhtar si qalabka iyo agabka caafimaad loo daboolo.

* Waxay u baahantahay ama u baahan kartaa ogolaansho hore.

Fadlan wac lambarka telefoonka shuruudaha caymiska qalabka caafimaadka waara ee ku yaal Qaybta 1 haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha caymiskayaga joogtada ah ee qalabka caafimaadka.

Adeegyada Caafimaadka Maskaxda

Adeegyada la daboolay:

- Rugta Caafimaadka Habdhaqanka Bulshada ee la shahaadiyey (CCBHC)
- Latalinta Daryeelka Caafimaadka
- Adeegyada wax ka qabashada dhibaatooyinka oo ay ka mid yihiin:
 - baadhitaanka
 - qiimaynta
 - wax ka qabashada
 - dejinta, oo ay ku jirto xasilinta deegaanka
 - wax ka qabashada bulshadda
- Qiimaynta baaritaanka oo ay ku jiraan baadhista jiritaanka jirrooyinka dhimirka ee wada socda iyo cilladaha isticmaalka muqaadaraadka
Dalabkaaga rafcaanka waa inay la socdaan:

- Magacaaga
- Taariikhdaada dhalashada
- Cinwaanka
- Lambarka xubinta
- Lambarka taleefanka
- Sababta rafcaanka

Waxa aad sidoo kale ku dari kartaa wixii macluumaadka ah ee aad doonayso in aanu eegno, sida duwaanada caafimaadka, waraaqo bixiyaha ka socda, ama macluumaad kale oo sharaxaya sababta aad ugu baahan tahay shayga ama adeega. La hadal bixiyahaaga hadii aad u baahan tahay macluumaadkan. Waxa aanu ku talinaynaa in aad nuqul ka reebato wax kasta oo aad noosoo dirayso oo duwaankaaga ah.

Racfaanada degdega ah ayaa loogu talagalay adeegyada degdega ah ee loogu baahan yahay.

Haddii aan ku heshiino inay degdeg tahay, waxaanu ku siin doonaa go'aan 72 saacadood gudahood. Waxaan isku dayi doonaa inaan kugula soo wacno go'aanka ka hama intaan go'aanka qamaaal u dirin.

Waxaa laga yaabaa inaan qaadano ilaa 14 maalmood oo dheeri ah haddii aan u baahanahay macluumaad dheeri ah oo ay ku jirto dantaada ama haddii adiga ama bixiyahaaga aad codsataan waqti dheeri ah. Waxaan kuu sheegi doonaa sababta aan u qaadaneyno waqtiga dheeriga ah.

Haddii racfaankaagu aanu ahayn mid degdeg ah, waxaanu kuu sheegi doonaa 10 maalmood gudahood inaan helnay. Waxaan ku siin doonaa go'aan qamaaal ah 30 maalmood gudahood. Waxaa laga yaabaa inaan qaadano ilaa 14 maalmood oo dheeri ah haddii aan u baahanahay macluumaad dheeri ah oo ay ku jirto dantaada ama haddii aad codsato waqti dheeri ah. Waxaan kuu sheegi doonaa inaan qaadaneyno waqti dheeri ah iyo sabab.

Qofka go'aan ka gaarayaa ma noqon doono isla qofka ku lug lahaa dib u eegis hamae ama go'aan-qaadasho.

Haddii aan go'aansanayno rafcaan ku saabsan adeegga la diiday sababtoo ah ma ahayn lagama maarmaan caafimaad ahaaneed, go'aanka waxaa gaari doona xirfadle daryeel caafimaad leh oo leh khibrad caafimaad oo ku habboon daaweynta xaaladdaada ama cudurkaaga.

Adiga ama wakiilkaaga waxaad ku soo bandhigi kartaan macluumaadkaaga shaqsi ahaan, taleefan, ama qamaaal.

Haddii aad rafcaan qaadato, waxaanu kuu soo diri doonaa adiga ama wakiilkaaga gal dacwadeedka marka la codsado, oo ay ku jiraan diiwaannada caafimaadka iyo dukumeentiyada kale iyo diiwaanada aanu tixgelinay inta lagu jiro nidaamka rafcaanka.

Si aad u xarayso Racfaan Goboleed (Dhegeysi cadaalad ah oo lala yeesho Gobolka) Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota:

YWaa inaad naga xaraysataa Rafcaan Qorshe Caafimaad **ka hor** inta aadan codsanin Racfaanka Gobalka. Waa inaad codsato Racfaanka Gobalkal **120 maalmood gudahood**laga bilaabo taariikhda go'aanka rafcaankayaga (go'aanka).

Racfaankaaga gobolka waa inuu ahaadaa qamaaal. Waxaad warqad u diri kartaa Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota si aad u codsato Racfaanka Gobolka.

Warqad u soo qor Xafiiska Racfaanka ee Waaxda Adeegyada
Aadanaha ee Minnesota
PO Box 64941
St. Paul, MN 55164-0941

Onlayn ahaan ku soo xaree: <https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-0033-ENG>

Ama fagas u dir: 651-431-7523

U sheeg gobolka sababta aad u diidan tahay go'aanka aanu gaadhay. Waxaad weydiisan kartaa saaxiib, qaraabo, u doode, bixiye, ama qareen inuu ku caawiyo. Bixiyahaagu waa inuu haystaa oggolaansho qamaaal ah si uu kuugu codsado Racfaan Gobalka.

Garsoomaaha adeegga aadanaha ee Xafiiska Racfaanka ee gobolka ayaa qaban doona dhageysi. Waxaad codsan kartaa inaad ka soo qaybgasho dhageysiga btelefoon ahaan, muuqaal ahaan, ama shakhsi ahaan Waxaad ka codsan kartaa bixiyayaashaada ama kuwa kale inay marag ka bixiyaan. Waxaad siin kartaa dukumeenti uu garsoomahu tixgeliyo.

Nidaamku wuxuu qaadan karaa 90 maalmood. Haddii dhegeysigaagu uu ku saabsan yahay adeeg si degdeg ah loogu baahan yahay, u sheeg Garsoomaaha ama Qofka Wakiilka u doodaha ah marka aad wacdo ama u qamato iyaga.

Haddii dhegeysigaagu uu ku saabsan yahay adeeg la diiday sababtoo ah ma ahayn lagamamaarmaan caafimaad, waxaad codsan kartaa inuu dib u eego khabiir caafimaad. Khabiirka caafimaadku wuu ka madaxbannaan yahay gobolka iyo UCare labadaba. Gobolka ayaa bixinaya kharashka dib u eegista. Wax kharash ah oo kugu kacaya ma jiro.

Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka garsoomaaha adeegga aadanaha, waxaad weydiisan kartaa gobolka inay dib u eegaan go'aankooda. U dir codsi qamaaal ah oo dib u eegis ah Xafiiska Racfaanka Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota 30 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda go'aanka. Macluumaadka xiriirka waxa ay ku qamaan tahay hamaraantii qeybtan.

Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka gobolka, waxaad rafcaan u qaadan kartaa maxkamadda degmada ee degmadaada.

Cabashooyinka (Dacwooyin)

Waxaa laga yaabaa inaad noo xerayso cabasho **wakhti kasta** ee arimaha mise walaacyada dhacay marka laga diiwaangeliyey qorshaha caafimaadka. Ma jiro wakhti go'an oo cabasho nalagu xerayn karo.

Si aad noogu soo gudbisno cabasho afka ah:

Ka wac adeegga macaamiisha lambarka taleefanka qaybta 1 oo noo sheeg dhibaataada.

Ka wac adeegga macaamiisha lambarka taleefanka qaybta 10 oo noo sheeg dhibaataada. Waxa laga yaabaa in aan qaadano ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah si aan go'aan uga gaarno haddii aan u baahanahay macluumaad dheeraad ah waxayna noqon doontaa dantaada ugu fiican ama haddii adiga ama bixiyahaagu aad codsataan wakhti dheeraad ah. Waxaan kuu sheegi doonaa 10 maalmood gudahood inaan qaadaneyno waqti dheeri ah iyo sababaha.

Haddii cabashadaadu ay ku saabsan tahay diidmadayada racfaanka degdegga ah ama cabashada ku saabsan arrimaha daryeelka caafimaadka degdegga ah, waxaan ku siin doonaa go'aan 72 saacadood gudahood.

Si aad noogu xarayso cabasho qoraal ah:

Warqad cabashadaada ku saabsan noo soo dir. Ku qama ciwaanka ku taxan qaybta 1 ee hoos timaada "Rcfaanada iyo Cabashada." Ama waxaad fagas noogu soo diri kartaa warqada ah anaga addoo isticmaalaya lambarka fagaska ku qran aybta 1. Waxaad sidoo kale noogu sheegi kartaa cabashadaada madashada bogga **member.ucare.org**.

Waxaan kaa caawin karnaa inaad cabashadaada qamaaal ahaan u gudbiso. Ka wac adeegga macaamiisha lambarka taleefanka qaybta 1 haddii aad u baahan tahay caawimo.

Waxaan kuu sheegi doonaa inaan ku helnay cabashadaada qoraal ahaan 10 maalmood gudahood.

Waxaan ku siin doonaa go'aan qamaaal ah 30 maalmood gudahood. Waxaa laga yaabaa inaan qaadano ilaa 14 maalmood oo dheeri ah haddii aan u baahanahay macluumaad dheeri ah oo ay dantaada ku jirto ama hadii adiga ama bixiyahaaga ay dalbadaan wakhti dheeraad ah. Waxaan kuu sheegi doonaa inaan qaadaneyno waqti dheeri ah iyo sabab.

Haddii aadan ku raacsanayn go'aankayaga, waxaad cabashadaada u gudbin kartaa Waaxda Caafimaadka ee Minnesota.

Warqad u qor: Waaxda Caafimaadka ee Minnesota
Siyaasadda Caafimaadka iyo Dabagalka Qeybta Nidaamka U
Hogaansanaanta Nidaamyada Daryeelka La maareeyo
PO Box 64882
St. Paul, MN 55164-0882

Soo wac: 1-800-657-3916 (wicitaankan waa bilaash) ama 651-201-5100

TTY: 711 ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad door bidayso.

Booqo: "health.state.mn.us/facilities/insurance/clearinghouse/complaints.html"

Waxa kale oo aad wici kartaa Qofka wakiilka u doodaha Dadweynaha ee Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka la Maareeyay si uu ku caawiyo. Macluumaadka xiriirka waxa ay ku qamaan tahay qaybtan ka dib.

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan xuquuqdaada marka aad buuxinayso cabasho, rafcaan, ama aad codsanayso Racfaan Dawladeed (Dhegeysi cadaalad ah oo lala leeyahay Gobolka):

Haddii aad go'aansato inaad xarayso cabasho ama rafcaan, ama aad codsato Racfaan Dawladeed, ma saamaynayso u-qalmitaankaaga adeegyada caafimaadka. Sidoo kale saameyn kuma yeelan doonto isdiiwaangelintaada qorshahayaga caafimaadka.

Waxaad heli kartaa qaraabo, saaxiib, u doode, bixiye, ama qareen kaa caawiya cabashadaada, racfaanka, ama Racfaanka Gobolka.

Ma jiro wax kharash ah oo kugu kacaya xereynta rafcaanka qorshaha caafimaadka, cabashada, ama racfaanka Gobolka. Waxaa laga yaabaa in aanu bixino kharashaadka qaarkood sida gaadiidka, daryeelka ilmaha, koobi garaynta, iwm.

Haddii aad weyddiisato diiwaannadaada caafimaad ama dukumeentiyo kale oo aan u isticmaalnay si aan u sameyno go'aankeenna ama aan rabno nuqullo, annaga ama bixiyahaaga waa in aan ku siino lacag la'aan. Haddii aad na weydiiso, waa in aan ku siino koobiga hab-raacyada aan u isticmaalnay si aan u gaarno go'aankayaga, iyada oo aan wax kharash ah kugu bixin. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad codsigaaga qamaaal ku qamato.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo cabashadaada, rafcaankaaga qorshaha caafimaadka ama Racfaanka Gobolka, waxaad wici kartaa ama u qori kartaa Qofka Wakiilka U doodaha ah Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka ee Dadweynuhu Maamulaan. Waxaa laga yaabaa inay kaa caawiyaan marin u helka, adeegga, ama dhibaatooyinka biilasha. Waxay kaloo kaa caawin karaan inaad noo xerayso cabasho ama rafcaan ama codso Racfaan Goboleed.

Soo wac: 651-431-2660 ama 1-800-657-3729 (wicitaankan waa bilaash) ama 711 (TTY), isticmaal qaabkaaga gudbinta aad door bidayso. Saacadaha adeeggu waa Isniinta ilaa Jimcaha 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo.

Ama

Warqad u qor Ombudsperson for Public Managed Health Care Programs
PO Box 64249
St. Paul, MN 55164-0249

Fagas u dir: 651-431-7472

Qeybta 14. Qeexitaanada

Kuwani waa macnaha erayada qaar ee buug-gacmeedkan xubinta.

Adeega Baarista: Adeeg aan la caddayn inuu badbaado iyo waxtar leeyahay.

Adeega lacagta ku xiran (FFS): Habka lacag bixinta adeegyada caafimaadka. Bixiyaha caafimaadku wuxuu si toos ah biilasha ugu soo dalacayaa Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (DHS). DHS waxay siisaa bixiyaha kharashka adeegyada caafimaadka. Habkan waxaa la isticmaalaa marka aad u qalanto Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka Minnesota laakiin aanad ku jirin Qorshe caafimaad.

Adeegga Tijaabada: Adeeg aan la caddayn inuu badbaado iyo waxtar leeyahay

Adeegyada Aagga ka baxsan: Daryeel caafimaad oo la siiyay xubin ay bixiso adeeg bixiye ka baxsan shabakadaha meel ka baxsan aagga adeega Qorshaha.

Adeegyada Dhakhaatiirta: Adeegyada uu bixiyo shaqsi rukhsad ka haysta sharciga gobolka si uu uga shaqeeyo daawada ama daliigitaanka lafaha. Adeegyada daryeelka caafimaadka dhakhtar caafimaad oo rukhsad haysta (MD - Dhakhtarka Caafimaadka ama DO - Dhakhtarka Cilmiga Lafo daliigitaanka) ayaa bixiya ama isku dubarida.

Adeegyada Helitaanka Tooska ah: Waxaad u tagi kartaa bixiye kasta oo ku jira shabakadda Qorshaha si aad u hesho adeegyadan. Uma baahnid tixraac ama ogolaansho hore oo ka socota PCP-gaaga ama PCC ka hama intaadan helin adeegyada.

Adeegyada Isbitaalka ee Bukaanku socodka: Adeegyada lagu bixiyo isbitaalka ama tas-hiilaadka bukaan-socodka ee aan ahayn heerka daryeelka bukaan-jiifka. Adeegyadan waxaa kale oo laga yaabaa in laga helo rugtaada caafimaadka ama goob kale oo caafimaad.

Adeegyada iyo Qalabka Baxnaaninta: Daawaynta iyo qalabka aad hesho si ay kaaga caawiyaan inaad ka soo kabsato jirro, shil ama qalliin weyn.

Adeegyada Ka Hamatagga: Adeegyada kaa caawiya inaad caafimaad qabtid, sida jirdhiska joogtada ah, tallaalada, iyo daryeelka qofka wanaagsan. Adeegyadani waxay caawiyaan helida iyo ka hamatagga dhibaatooyinka caafimaadka. Dabagalka xaaladaha la helay (sida baaritaanka sonkamaowga) waa **kuwa aan ahaynka** hortag.

Adeegyada la daboolay: Adeegyada daryeelka caafimaadka ee u qalma lacag-bixinta.

Adeegyada Laga Reebay: Adeegyada qamashuhu uusan kharashkooda bixinin. Kaalmada Caafimaadka iyana kharash kama bixin doonto iyaga.

Adeegyada Shabakadda Ka baxsan: Daryeel caafimaad oo la siiyay xubin uu bixiyo adeeg bixiye aan ka mid ahayn shabakada qorshaha.

Adeegyada xasilinta guryaha: Adeegyada lagu caawiyo dadka naafada ah, oo ay ku jiraan jirrooyinka dhimirka iyo cilladaha isticmaalka mukhaadaraadka, iyo in waayeelka ay helaan oo ay haystaan guri. Ujeedada adeegyadani waa in la taageero u guurista qofka guri, kordhinta xasilloonida muddada dheer ee guriyeynta bulshada, iyo in laga fogaado xilliyada guri la'aanta mustaqbalka ama hay'adaynta.

Adeegyo Furan oo la Heli karo: Sharciga federaaliga iyo gobolka ayaa kuu ogolaanaya inaad doomaato bixiye kasta oo daryeel caafimaad, rug caafimaad, isbitaal, farmashiye, ama wakaaladda kala fogaynta dhalnada - xitaa haddii aysan ku jirin shabakadayada - si aad u hesho adeegyadan.

Barnaamijka Daawooyinka dhakhtarku qamao ee Medicare: Faa'iidada daawada lagu qamaay ee xubnaha Medicare. Waxaa mararka qaarkood loo yaqaan Medicare Qaybta D. Caymiska daawada waxaa lagu bixiyaa qorshaha daawada la qamao ee Medicare.

Barnaamijka Ka Faa'iidaystaha Xaddidan (RRP): Barnaamij loogu talagalay xubnaha helay daryeel caafimaad oo aan raacin shuruucda ama si xun u isticmaalay adeegyada. Haddii aad ku jirto barnaamijkan, waa inaad ka heshaa adeegyo caafimaad mid loo qoondeeyay bixiye daryeel caafimaad, hal farmashiye, hal isbitaal ama bixiye kale oo daryeel caafimaad loo qoondeeyay. Waa inaad tan sameysaa ugu yaraan 24 bilood oo xaq u yeelashada Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka Minnesota. Xubnaha barnaamijkan ku guuldareysta inay raacaan shuruucda barnaamijka waxaa looga baahan doonaa inay sii wataan barnaamijka 36 bilood oo dheeri ah.

Bixiyaha Daryeelka Aasaasiga ah: Bixiyaha daryeelkaaga aasaasiga ah (PCP) waa dhakhtarka ama bixiye daryeel caafimaad oo kale oo aad u isticmaasho rugtaada daryeelka aasaasiga ah. Qofkan ayaa maamuli doona daryeelkaaga caafimaad.

Bixiyaha Shabakadda ka baxsan ama Xarunta Shabakadda ka baxsan: Bixiye ama xarun aysan shaqaalaysiin, lahayn, ama aan ku shaqayn qorshahayagu oo aan qandaraas ku jirin in uu siiyo adeegyada la daboolay xubnaha Qorshaha. Tan waxaa kale oo loo yaqaan bixiye aan ka qaybgelin.

Bixiyeaasha shabakada: Kuwani waa bixiyayaasha ku heshiia inay la shaqeeyaan qorshaha

caafimaadka oo aqbala lacag bixintayada oo aan xubnahayaga ku soo dalacin lacag dheeri ah. In kasta oo aad xubin ka tahay caymiskeena, waa inaad isticmaashaa bixiye ku jira dalada si aad u hesho adeegyada caymisku bixinayo. Bixiyeyaasha shabakada waxaa sidoo kale loogu yeeraa bixiyeyaasha Qorshe ama bixiyeyaasha ka qaybqaata.

Buug-gacmeedka Xubinka: Kani waa dukumeentiga aad akhrinayso. Dukumeentigani wuxuu kuu sheegayaa adeegyada lagu daboolay Qorshaha. Waxay kuu sheegaysaa waxa ay tahay inaad samayso si aad u hesho adeegyada la daboolay. Waxay kuu sheegaysaa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga. Waxaa kale oo ay sheegaysaa xuquuqdeena iyo waajibaadkeena.

Caafimaad ahaan lagama maarmaan ah: Tani waxay qeexaysaa adeegyada, agabka, ama daawooyinka aad u baahan tahay si aad uga hamatagto, u baadho, ama u daaweyso xaaladaada caafimaad ama si aad u ilaaliso xaaladaada caafimaad ee hadda. Waxaa tan kamid ah daryeelka kaa ilaalinaya inaad gasho isbitaal ama guriga kaaliyaha caafimaadka. Waxa uu sidoo kale ka dhigan yahay adeegyada, agabyada, ama dawooyinka buuxiya heerarka caadiga ah ee nidaamka caafimaad. Daryeelka caafimaad ahaan daruuriga ah waxaa uu ku haboon yahay xaaladaada. Tan waxa ku jira daryeelka la xidhiidha xaaladaha jidhka iyo caafimaadka hab-dhaqank(oo ay ku jirto caafimaadka dhimirka iyo Ciladaha isticmaalka mukhaadaraadka). Waxa sidoo kale kamid ah nooca iyo heerka adeegyada. Waxa sidoo kale kamid ah tirada daawaynta. Waxaa sidoo kale kamid ah halka aad ka heleyso adeegyada iyo mudada ay soconayaan. Adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah waa inay:

- noqdaan adeegyada, agabka iyo daawooyinka dhakhtarku qoro ee bixiyeyaasha kale ay badanaa dalban doona
- kaa caawinaya inaad sidan dhaanta ama inaad caafimaad qabto
- lagu baajinayo in xaaladaadu kasii darto
- kaa caawiso ka hortagga ama inay kugu dhacaan dhibaatooyin caafimaad

Cabashada Tayada daryeelka: Ujeedooyinka buug-gacmeedkan, "cabashada tayada daryeelka" macneheedu waa ku qanacsanaan la'aan la soo bandhigay oo ku saabsan adeegyada daryeelka caafimaadka taasoo ka dhalan karta waxyeello suurtagal ah ama dhaawac dhab ah oo xubin ah. Cabashooyinka tayada daryeelka waxaa ka mid noqon kara: helitaan, bixiyaha iyo kartida shaqaalaha, ku habboonaanta kiliinikada ee daryeelka, isgaarsiinta, dhaqanka, xarunta iyo tixgelinta deegaanka, iyo arrimo kale oo saamayn kara tayada adeegyada daryeelka caafimaadka.

Cabashada: Cabashada aad naga gudbisay anaga ama mid ka mid ah bixiyeyaasha shabakadaha ama farmashiyada. Tan waxaa kamid ah cabasho ku saabsan tayada daryeelkaaga.

Caymiska Dawooyinka lagu qamaay: Qorshe caafimaad oo ka caawinaya bixinta kharashka dawooyinka iyo dawooyinka la soo qamaay. Sidoo kale tixraac "Barnaamijka Dawooyinka la qamao ee Medicare."

Cudurada ka dhasha Icticmaalka Maandoamaiye: Icticmaalka khamriga ama maandoamaiyaha si wax kuu dhimaya.

Daawooyinka la qamaay: Daawooyinka uu dalbado bixiye caafimaad.

Daraasadda Dib u eegista Tayada Dibadda: Daraasad ku saabsan sida tayada, waqtiga iyo helitaanka daryeelka ay bixiyaan UCare. Daraasadani waa mid dibadda ah oo madax bannaan.

Daryeel bixiye: Xirfadle daryeel caafimaad oo u qalma ama xarun lagu ansixiyay sharciga gobolka si ay u bixiso daryeel caafimaad.

Daryeelka Bukaansocodka Isbitaalka: Daryeelka isbitaal oo aan u baahnayn in la joogo habeenkii.

Daryeelka Caafimaadka Guriga: Adeegyada daryeelka caafimaadka ee jirro ama dhaawac ee lagu bixiyo guriga ama bulshada dhexdeeda halkaas oo hawlaha nololeed ee caadiga ah ay qaataan xubinka.

Daryeelka dadka waaweyn ee Minnesota (MSC+): Waa barnaamij uu gobolku qandaraas kula galo qorshayaasha caafimaadka si uu u daboolo oo loo maareeyo daryeelka caafimaadka iyo Adeegyada Ka-dhaafitaanka Waayeelka ee Caawinta Caafimaadka xubnaha 65 jirka iyo kuwa ka weyn.

Daryeelka Degdega ah ee loo baahan yahay: Daryeel aad u hesho jirro lama filaan ah, dhaawac, ama xaalad aan ahayn xaalad degdeg ah balse u baahan daryeel isla markaaba. Tan waxa kale oo loo yaqaan daryeelka degdegga ah.

Daryeelka Kalkaaliso caafimaad oo Khibrad leh: Daryeelka ama daawaynta ay samayn karaan oo kaliya kalkaaliyayaal shati haysta.

Daryeelka xasilinta kadib: Adeegga isbitaalka ayaa loo baahan yahay si uu u caawiyo xaaladaha qofka inay deganaadaan ka dib marka la helo daryeel degdeg ah. Waxay bilaabataa marka isbitaalku naga codsado ogolaanshaha caymiska. Way soconaysaa ilaa: qofka laga saarayo; Shabakadeena Qorshaha Bixiyaha daryeel caafimaad oo u qalma uu bilaabo daryeel; ama annagu, isbitaalka, iyo bixiyaha daryeelka caafimaadka ee aqoonta u leh aan ku heshiino habayn kale.

Daryeelka/Adeegyada Degdegga ah: Adeegyada la daboolay ee uu bixiyo adeeg bixiyaha loo tababaray bixinta adeegyada degdegga ah loona baahan yahay in lagu daweyo xaalad degdeg ah oo caafimaad. Tan waxaa kale oo loo yaqaan Daryeelka Qolka Degdegga ah.

Diidmo, Joojin ama dhimis (DTR) (Ogaysiis Ficil): Foom ama warqad aan kuu soo dirno si aan kuugu sheegno go'aanka dacwadda, adeegga, ama tallaabo kasta oo kale oo aannu qaadnay.

Gaadiidka Caafimaadka Degdegga ah: Adeegyada ambalaasta ee xaalad caafimaad oo degdeg ah.

Goobta Adeega: Goobta ay tahay in qofku ku noolaado si uu u awoodo in uu xubin ka noqdo QORSHAHA. Kala xidhiidh Adeegga Macmiilka lambarka taleefanka ee qaybta 1 wixii tafaasiil ah ee ku saabsan goobta adeega.

Guriga daryeelka dadka jirran: Barnaamij gaar ah oo loogu talagalay xubnaha jirran ee aan la filaynin inay noolaadaan in ka badan lix bilood si ay ugu noolaadaan raaxo inta ka hartay mudada xubinka. Waxay siisaa adeegyo gaar ah xubinka iyo qoyskooda. Tan waxa kale oo loo yaqaan Adeegyada guriga daryeelka dadka jirran.

Guriga iyo Adeegyada Ku-saleysan Bulshada: Adeegyo dheeri ah oo lagu bixiyo si ay kaaga caawiyaan inaad gurigaaga sii joogto.

Guriga kalkaalinta la sharciyayn karo: Go'aanka ah in aad u baahan tahay heerka daryeelka guriga kalkaalinta. Baaruhu wuxuu isticmaalaa hab lagu magacaabo La-talinta Daryeelka Muddada-dheer si uu u go'aamiyo.

Ikhtiyaarka labaad: Haddii aadan ku raacsanayn ra'yi aad ka hesho bixiye shabakad Qorshe, waxaad xaq u leedahay inaad fikrad ka hesho bixiye kale. Waanu bixin doonaa lacagtatan. Adeegyada caafimaadka dhimirka, ra'yiga labaad waxa laga yaabaa inuu ka yimi bixiye shabakad ka baxsan. Adeegyada cudurada ka dhasha isticmaalka mukhaadaraadka, ra'yiga labaad wuxuu ka iman doonaa qiimeeye aqoon kale oo aan u baahnayn inuu ku jiro shabakada Qorshaha. Waa inaan tixgelinno ra'yiga labaad laakiin maaha inaan aqbalno ra'yi labaad oo ku saabsan cilladda isticmaalka mukhaadaraadka ama adeegyada caafimaadka dhimirka.

Isbitaal seexinta: Daryeelka isbitaal u baahan in la seexiyo bukaan-jiif ahaan oo inta badan u baahan in habeenkii la joogo.

Isku duwaha daryeelka: Qofka horumariya, isku duwa oo bixiye (xaaladaha qaarkood) taageerooyinka iyo adeegyada lagu sheegay qorshaha daryeelka.

Isku duwaha daryeelka: Qofka horumariya, isku duwa oo bixiye (xaaladaha qaarkood) taageerooyinka iyo adeegyada lagu sheegay qorshaha daryeelka. Qofkani annaga ayuu nala shaqeeyaa.

Isla bixin/Isla bixinta: Lacag go'an oo aad ku bixin karto qayb ahaan kharashkaaga mar kasta oo aad hesho adeegyo gaar ah, sahay, ama dawooyin dhakhtar qamaay. Kharashka la wada bixiyo waxaa badanaa la bixiyaa marka adeegyada, saadka, ama daawooyinka la qamao la bixiyo. Tusaale ahaan, waxaad ku bixin kartaa \$1 – \$3.50 adeegyada, saadka ama daawooyinka lagu qamaay.

Joogitaanka Isbitaal ee Bukaan-jiifka: Joogitaanka isbitaal ama xarun daawayn oo badanaa qaadata 24 saacadood ama ka badan.

Kala fogaynta dhalmada: Macluumaadka adeegyada, iyo agabka qofka ka caawiya inuu go'aansado inuu carruur dhalo. Go'aamadan waxaa ka mid ah doomaashada inaad ilmo dhasho, goamata aad ilmo dhalayso, ama inaad ilmo dhalin.

Kartida Dhaqanka: Kartida dhaqanka iyo luuqada waa awooda ururada daryeelka la maareeyay iyo bixiyayaasha shabakadooda si ay u siiyaan daryeelka xubnaha leh qiyamka kala duwan, caqiidooyinka iyo dhaqamada, iyo in ay habeeyaan bixinta daryeelka si ay u daboolaan baahiyaha bulsho, dhaqan, iyo luqadeed ee xubnaha. Hadafka ugu dambeeya waa nidaamka bixinta daryeelka caafimaadka iyo xoog shaqaale oo gaarsiin kara tayada ugu sareysa ee daryeelka bukaan kasta, iyadoon loo eegin jinsiyadda, qowmiyadda, dhaqanka qofka, aqoonta luuqada, akhris-qamaaalka, da'da, jinsiga, nooca galmada, naafanimada, diinta, ama heerka dhaqan-dhaqaale.

Khabiirka: waxaa weeye dhakhtar bixiye daryeelka caafimaadka ee xanuun gaar ah ama qayb kamid ah jidhka.

Lacagta caymiska: Lacag-bixinta xilliyeedka ah ee Medicare, shirkad caymis ah, ama qorshaha daryeelka caafimaadka ee caymiska caafimaadka ama daawada lagu qamaay.

Liis: Liiska dawooyinka lagu daboolay Qorshaha.

Maraykanka: Wixii ah ujeedada Buug-gacmeedkan Xubinta, Maraykanka waxa ku jira kontonka gobol, Degmada Columbia, Barwaaqo-soomaanka Puerto Rico, Jasiiradaha Virgin Islands, Guam, Samoa Ameerika, iyo Jasiiradda Waqooyiga Mariana..

Matalaada: Xuquuqdayada inaanu lacag magacaaga kaga ururino qof kale, koox, ama shirkad caymis. Waxaan xaq u leenahay marka aad ka hesho caymiska caafimaadka ee hoos yimaada Qorshahan adeegga uu daboolay ilo kale ama bixiyaha qayb saddexaad.

Medicare: Barnaamijka caymiska caafimaadka federaalka ee dadka da'doodu tahay 65 jir ama ka weyn. Waxaa kale oo loogu talagalay dadka qaar ka yar da'da 65 ee naafada ah, iyo dadka qaba Cudurka Kelyaha ee Heerka ugu dambeeya.

Oggolaanshaha Hore: Oggolaanshahayaga ee loo baahan yahay adeegyada qaar ka hor intaadan helin. Tan waxa kale oo loo yaqaan oggolaansho ka hama ama oggolaansho adeeg.

Ogolaanshaha Adeega: Oggolaanshahayaga ee loo baahan yahay adeegyada qaar ka hama intaadan helin. Tan waxa kale oo loo yaqaan oggolaansho kahama ama oggolaansho hamae.

Ogolaanshaha Joogtada ag: Ogolaansho qamaan oo anaga qamanay si aan u isticmaalno khabiir ka baxsan qorshaha shabakada hal mar wax ka badan (daryeel joogto ah).

Qalab Caafimaad oo Waara (DME): Qalabyada caafimaad qaarkood ee uu dhakhtarkaagu dalbay si loogu isticmaalo guriga. Tusaalooyinka waxa kamid ah kuwa socod baradka, kuraasta curyaanka, qalabka ogsijiinta iyo agabka.

Qorshaha Daawooyinka dhakhtarku qamao ee Medicare: Qorshe caymis oo bixiya Barnaamijka Daawooyinka dhakhtarku qamao ee Medicare (Medicare Qaybta D) faa'iidooyinka daawada.

Qorshaha Dhiirigelinta Dhakhtarka: Nidaam lacag-bixineed oo gaar ah oo naga dhexeeya annaga iyo dhakhtarka ama kooxda dhakhtarka oo laga yaabo inay saamayso isticmaalka gudbinta. Waxaa kale oo laga yaabaa inay saamayso adeegyada kale ee laga yaabo inaad u baahato.

Qorshe: Goob leh shabakad dhakhaatiir, isbitaallo, farmashiye, bixiyeyaasha adeegyada muddada dheer, iyo bixiyeyaasha kale. Waxaa kale oo ay leedahay isku-duwayaal daryeel oo ku caawiya.

Qaybsiga kharashka: Lacagta aad masuulka ka tahay inaad ku bixiso adeegyadaada caafimaad. Tixraac qaybta 6-aad ee macluumaadka ku wadaagista kharashka.

Qofka u xil saaran dacwadaha Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka ee Dadweynuhu Maamulaan: Qof jooga Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota oo kaa caawin kara helitaanka, adeega ama dhibaatooyinka biilasha. Qofka wakiilka u doodaha dacwadaha waxaa kale oo uu kaa caawin karaa in aad gudbiso cabasho ama racfaan ama aad codsato Racfaan Goboleed (Dhegeysi cadaalad ah oo lala yeesho gobolka).

Racfaan: Hab aad kaga doodi karto talaabadeena haddii aad u malaynayso inaanu khalad samaynay.

Racfaanka Gobolka (Dhegeysi cadaalad ah oo lala yeesho Gobolka): Dhageysiga gobolka si dib loogu eego go'aanka anaga aanu gaarnay. Waa in aad qoraal ku codsato dhageysi. Bixiyahaagu waxa laga yaabaa inuu codsado Racfaan Dawladeed isagoo wata ogolaanshahaaga qamaaal ah. Waxaad codsan kartaa dhageysi haddii aadan ku raacsanayn mid ka mid ah kuwan soo socda:

- diidmada, joojinta, ama dhimista adeegyada
- ku soo biiritaanka Qorshaha
- diidmada qayb ama dhammaa adeegga
- Guuldaradayada in aan ku fulino waqtiyada loo baahan yahay ogolaanshaha iyo rafcaannada hamae
- Talaabo kasta oo kale

Rugta daryeelka aasaasiga ah: Rugta daryeelka aasaasiga ah (PCC) ee aad u doomaato daryeelkaaga joogtada ah. Rugtani waxay ku siin doontaa inta badan daryeelkaaga.

Shabakad: Bixiyeyaashayada daryeelka caafimaadka qandaraaska qaatay ee Qorshaha.

Suuxitaan: Daawoyinka kaa dhigaya inaad u seexato qalliin.

Tallaabada: Tan waxaa ku jira:

- diidmada ama oggolaanshaha xaddidan ee nooca ama heerka adeegga ah
- dhimista, hakinta, ama joojinta adeeg hore loo ansixiyay
- diidmada dhammaan ama qayb ka mid ah bixinta adeegga
- in aan lagu bixin adeegyo waqti macquul ah
- Aan ku dhaqmin muddada loo baahan yahay ee cabashooyinka iyo rafcaannada
- diidmada codsiga xubinka si ay u helaan adeegyada ka baxsan shabakada ee xubnaha ku nool aagga miyiga ee leh hal qorshe caafimaad oo keliya

Tijaabada Caafimaad: Baaritaan daraasad caafimaad oo aqoon leh oo ah: ku xiran dib u eegis qeexan; uu kafaalo qaaday barnaamij cilmi baaris caafimaad oo buuxiya shuruuca federaalka iyo gobolka iyo halbeegyada la ansixiyay; oo natiijooyinkiisa runta ah la soo sheegay.

Xaalad degdeg ah: Xaaladda degdega ah ee caafimaadku waa marka adiga, ama qof kasta oo kale oo u leh aqoon iska caadi ah caafimaadka iyo daawada, uu aamino in aad leedahay calaamado caafimaad oo u baahan daryeel caafimaad oo degdeg ah si looga hamatago dhimashada, waayitaanka xubin jidhka ah, ama waayitaanka shaqada qayb jidhka ah ama waxay keeni kartaa dhaawac jidheed ama maskaxeed oo daran. Calaamadaha caafimaadku waxay noqon karaan dhaawac halis ah ama xanuun daran. Tan waxa kale oo loo yaqaan Xaalada Caafimaad ee Degdega ah.

Xarunta Kalkaalinta Xirfadlaha: Xarun bixisa daryeelka kalkaalisada xirfada leh ee bukaan-jiifka, adeegyada baxnaaninta ama adeegyada kale ee caafimaadka la xiriira. Medicare waa inuu aqoonsi siiyaa xaruntan haddii aad qaadanayso dheefaha Medicare.

Xubin: Qofka adeegyada ku helaya barnaamij gaar ah, sida barnaamijka daryeelka caafimaadka Minnesota ama Medicare.

Qeybta 15. Macluumaadka Dheeraadka ah

Su'aalo iyo jawaabo ku saabsan tilmaamaha daryeelka caafimaadka Sharciga Minnesota

Sharciga Minnesota wuxuu kuu ogolaanayaa inaad u sheegto dadka kale rabitaannadaada daryeelka caafimaadka. Waxaad xaq u leedahay inaad ku sheegto rabitaankaaga ama aad magacowdo wakiil qamaaal ah si ay kuwa kale u ogaadaan waxaad rabto haddii aadan u sheegi karin jirro ama dhaawac. Macluumaadka soo socdaa waxa ay ka warramayaan dardaaranka daryeelka caafimaadka iyo sida loo diyaariyo. Ma bixiso faahfaahin kasta oo sharciga ah.

Waa maxay dardaaranka daryeelka caafimaad?

Tilmaamaha daryeelka caafimaadku waa dukumeenti qamaan kaasoo dadka kale u sheegaya rabitaankaaga ku saabsan daryeelkaaga caafimaad. Waxay kuu ogolaanaysaa inaad magacowdo qof ("wakiil") si uu kuu go'aamiyo haddii aadan awoodin inaad go'aansato. Waxa kale oo ay ku ogolanaysaa in aad magacowdo wakiil haddii aad doonayso in qof kale kuu go'aamiyo. Waa inaad ahaataa ugu yaraan 18 jir si aad u samayso dardaraan daryeel caafimaad.

Waa maxay sababta dardaaranka daryeelka caafimaadka muhiim u yahay?

Dardaaranka daryeelka caafimaadku waa muhiim haddii dhakhtarkaagu go'aamiyo inaad la xidhiidhi karin doomaashooyinka daryeelka caafimaadkaaga (sabato ah awood la'aanta jirka ama maskaxda). Sidoo kale waa muhiim haddii aad rabto in qof kale uu gaaro go'aamada daryeelka caafimaadkaaga. Xaaladaha qaarkood, dardaarankaagu wuxuu sheegi karaa inaad rabto qof aan ahayn takhtarka jooga inuu go'aansado marka aanad adigu samayn karin go'aannadaada.

Ma inaan lahaado dardaraan daryeel caafimaadbaa? Maxaa dhacaya haddii aanan mid haysan?

Uma baahnid inaad haysato dardaraan daryeel caafimaad. Laakin qamaitaanka mid waxay kaa caawinaysaa inaad hubiso in rabitaankaaga la raacay. Weli waxaad heli doontaa daawaynta haddii aadan haysan dardaraan qamaaal ah. Bixiyeyaasha daryeelka caafimaadku waxay dhageysan doonaan waxa dadka kugu dhow ay ka sheegaan dookhyadaada daawaynta, laakiin sida ugu fiican ee lagu hubin karo in rabitaankaaga la raacay waa in la helo dardaraan daryeel caafimaad.

Sideen u sameystaa dardaaranka daryeelka caafimaadka?

Waxaa jira foomamka dardaaranka daryeelka caafimaadka. Looma baahna inaad isticmaasho foom, laakiin dardaarankaaga daryeelka caafimaadka waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda si uu sharci u noqdo:

- ha ahaato mid qamaaal ah oo taariikhaysan.
- Magacaaga sheeg.
- Inuu saxiixo adiga ama qof aad u ogolaatay inuu kuu saxiixo, marka aad fahmi karto oo aad la xiriiri karto rabitaanka daryeelka caafimaadkaaga.

- Saxeexaaga ha xaqiijiyo nootaayo dadweyne ama laba markhaati.
- Ku dar ballanta wakiilka si uu kuu gaaro go'aamada daryeelka caafimaadka adiga iyo/ama tilmaamaha ku saabsan doomaashooyinka daryeelka caafimaadka ee aad rabto inaad sameyso.

Kahama intaadan diyaarin ama dib u eegin dardaarankaada, waa inaad kala hadashaa rabitaanka daryeelka caafimaadka dhakhtarkaaga ama bixiyaha kale ee daryeelka caafimaadka. Macluumaadka ku saabsan sida loo helo foomamka diyaarinta dardaarankaaga daryeelka caafimaadka waxa laga heli karaa dhammaadka dukumeentigan, hoosta "Sida loo helo macluumaad dheeraad ah."

Waxaan dardaarankayga ku diyaariyay gobol kale. Wali ma wanaagsan tahay?

Awaamiirta daryeelka caafimaadka ee laga diyaariyay gobolada kale waa sharci haddii ay buuxiyaan shuruudaha sharciyada gobolka kale ama shuruudaha Minnesota. Laakiin Racfaanada isdilka ah ee la caawiyay lama raaci doono.

Maxaan gelin karaa dardaaranka daryeelka caafimaadka?

Waxaad haysataa doomaashooyin badan oo ah waxa aad geliso dardaaranka daryeelka caafimaadkaaga. Tusaale ahaan, waxaad ku dari kartaa:

- Qofka aad ku kalsoon tahay inuu wakiil kuu yahay inuu kuu sameeyo go'aannada daryeelka caafimaadka. Waxaad magacaabi kartaa wakiillo kale haddii ay dhacdo in wakiilka koowaad la waayo, ama wakiilo si wadajir ah.
- Hadafkaaga, qiyamkaaga, iyo dookhyadaada ku saabsan daryeelka caafimaadka.
- Noocyada daawaynta ee aad rabto (ama aadan rabin).
- Sida aad rabto in wakiilkaaga ama wakiiladaadu ay go'aansadaan.
- Halka aad rabto in aad daryeel ka hesho.
- Tilmaamaha ku saabsan nafaqada macmalka ah iyo fuuq-celinta.
- Daawooyinka caafimaadka maskaxda ee isticmaala daawaynta elektamaooniga ah ama daawooyinka dejinta neerfaha.
- Tilmaamaha haddii aad uur leedahay.
- Ku deeqidda xubno, unugyada, iyo indho.
- Qaban qaabadal aaska.
- Cidda aad jeclaan lahayd sidii mas'uulkaaga ama ilaaliyahaaga haddii ay jirto tallaabo maxkamadeed.

Waxaad noqon kartaa mid gaar ah ama mid guud sidaad rabto. Waxaad doomaan kartaa arrimaha ama daawaynta aad wax kaga qabanayso dardaaranka daryeelka caafimaadkaaga.

Ma jiraan wax xad ah oo aan ku dari karo dardaaranka daryeelka caafimaadka?

Waxa jira xadad ku saabsan waxa aad geli karto dardaaranka daryeelka caafimaadkaaga.

Tusaale ahaan:

- Wakiilkaagu waa inuu jiraa ugu yaraan 18 sano.
- Wakiilkaagu ma noqon karo bixiyahaaga daryeelka caafimaadka, ilaa bixiyaha xanaanada caafimaadka uu yahay xubin qoyska ka tirsan ama aad bixiso sababaha magaca wakiilka ee dardaarankaaga.
- Ma codsan kartid daaweyn daryeel caafimaad oo ka baxsan dhaqanka caafimaad ee macquulka ah.
- Ma codsan kartid is-dilid lagu caawiyo.

Ilaa intee ayuu dardaaranka daryeelka caafimaadku jiraa? Ma bedeli karaa?

Dardaaranka daryeelka caafimaadkaagu waxa uu jiraa ilaa aad ka bedesho ama tirtirto. Ilaa inta ay isbedeladu ka soo baxayaan shuruudaha dardaaranka caafimaadka ee kama ku taxan, waxa aad burin kartaa dardaarankaaga mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Qamaal qiraal ah oo sheegaya inaad rabto inaad tirtirto.
- Tirtiritaankeeda.
- U sheegida ugu yaraan laba qof oo kale inaad rabto inaad joojiso.
- Qamaitaanka dardaraan daryeel caafimaad oo cusub.

Maxaa dhacaya haddii bixiyaha xanaanada caafimaadkaygu diido inuu raaco dardaaranka daryeelka caafimaadka?

Bixiyaha dareelka caafimaadkaaga guud ahaan wuxuu raaci doonaa dardaaranka daryeelka caafimaadkaaga, ama tilmaamo kasta oo ka yimaada wakiilkaaga, ilaa iyo inta daryeelka caafimaadku raacayo habdhaqan caafimaad oo macquul ah. Laakin adiga ama wakiilkaagu ma codsan kartaan daawayn aan ku caawin doonin ama daryeel bixiye aanu ku siin karin. Haddii bixiyaha uusan raaci karin tilmaamaha wakiilkaaga ee ku saabsan daawaynta noloshaha- waarta, bixiyaha waa inuu ku wargeliyaa wakiilka. Bixiyuhu waa inuu sidoo kale ku diiwaangeliyaa ogeysiiska ku jira diiwaanka caafimaadkaaga. Bixiyuhu waa inuu u oggolaadaa wakiilka inuu kuu soo wareejiyo daryeel bixiye kale kaas oo raaci doona tilmaamaha wakiilka.

Maxaa dhacaya haddii aan hamaay u diyaariyay dukumeenti daryeel caafimaad? Wali ma wanaagsan tahay?

Kahama Ogosto 1, 1998, sharciga Minnesota wuxuu bixiyay dhowr nooc oo kale oo dardaraan ah, oo ay ku jiraan dardaaranno nololeed, awoodo daryeel caafimaad oo waara, iyo cadeynta caafimaadka dhimirka. Sharcigu wuu isbedelay si dadku ay hal foom ugu isticmaalaan dhammaan tilmaamaha daryeelka caafimaadka. Foomamka la sameeyay kahama Ogosto 1, 1998, wali waa sharci haddii ay raacaan sharciga dhaqangal ah markii la qamaayo. Sidoo kale waa sharci haddii ay buuxiyaan shuruudaha sharciga cusub (kama lagu qeexay). Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad dib u eegto dukumeenti kasta oo jira si aad u hubiso inay sheegaan waxaad rabto oo ay buuxiyaan dhammaan shuruudaha.

Maxaan ku sameeyaa dardaarankayga daryeelka caafimaadka kadib markaan saxeeexo?

Waa inaad dadka kale u sheegtaa dardarankaaga daryeelka caafimaadka oo aad dadka siisaa nuqulo. Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad u sheegto xubnaha qoyska, wakiilkaaga daryeelka caafimaadka ama wakiilada, iyo bixiyeyaashaada daryeelka caafimaadka inaad haysato dardaran daryeel caafimaad. Waa inaad siisaa nuqul. Waa fikrad wanaagsan inaad dib u eegto oo aad cusboonaysiiso dardarankaaga marka baahiyahaagu isbedelaan. Ku hay meel ammaan ah oo si fudud looga heli karo.

Maxaa dhacaya haddii aan rumaysto in bixiye daryeel caafimaad uusan raacin shuruudaha dardaranka daryeelka caafimaadka?

Cabashooyinka noocan ah waxaa lagu xareyn karaa Xafiiska Cabashada Xarunta Caafimaadka 651-201-4200 or 800-369-7994 (wicitaankan waa bilaash). Isticmaalayaasha TTY, wac 651-201-5797. Ama iimayl u dir: health.ohfc-complaints@state.mn.us.

Maxaa dhacaya haddii aan rumaysto in qorshe caafimaad uusan raacin shuruudaha dardaranka caafimaadka?

MDH Daryeelka la maareeyo lambarka 651-201-5176 ama 888-345-0823 (wicitaankan waa bilaash). Isticmaalayaasha TTY, wac 651-201-5797. Iimaylka: health.mcs@state.mn.us.

Sida loo helo macluumaad dheeri ah

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dardaranka daryeelka caafimaadka, la xidhiidh bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga, qareenkaaga, ama Khadka Dadka Waayeelka ah ee eniama LinkAge ee Minnesota® ee 800-333-2433. TTY: Minnesota Gudbinta lambarka 711 ama 800-627-3529. Taleefannadani waa bilaash. Foom dardaran caafimaad oo la soo jeediyay ayaa laga heli karaa intarneedka lightthelegacy.org/health-care-directive-downloads.

Sida UCare u qiimeyso tignoolajiyada cusub

Haddii bixiyahaagu kugula taliyo tignoolajiyad cusub oo aan hadda la daboolin, UCare waxay leedahay hab lagu qiimeeyo tignoolajiyada cusub. Marka tiknoolajiyada cusubi soo galaan suuqa (qalabka, hababka ama daawooyinka), guddiyada tayada iyo tayada ee UCare iyo agaasimayaasha caafimaadka si taxadar leh u baadho oo dib u eegaan teknoolojiyadda cusub ka hama inta aysan go'aamin baahidooda caafimaad iyo/ama ku habboonaanta. Waxaan u isticmaalnaa macluumaadka laga soo ururiyay ilo badan dadaalladayada qiimeynta, oo ay ku jiraan Hayes, Inc. Warbixinnada Qiimaynta Tignoolajiyada, bayaanka caafimaadka ee asxaabta la daabacay, bayaannada la isku raacsan yahay iyo tilmaamaha ururada caafimaadka qaranka iyo ururada takhasuska dhakhaatiirta, Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Mareykanka (FDA), hay'adaha kale ee sharciyeynta, iyo ilo khabiiri gudaha iyo dibadda ah.

Oggolaanshaha iyo ogeysiinta

UCare waxay doonaysaa inaad hesho daryeelka ugu haboon ee baahiyaha gaarka ah. Si taas oo saleeyo, waxa aanu si dhaw ugala shaqaysaa dhakhtarkaaga naqdinta adeegyada iyo nidaamyada kala duwan. Buug-gacmeedka Xubintu waxa uu sheegaa daryeelka iyo adeegyada u baahan ogaysiinta ama oggolaanshaha UCare. Fadlan oggow in liiskan is bedeli karo. Tusaale ahaan waxaa ka mid ah qalliinka laf dhabarta iyo daryeelka caafimaadka guriga.

Ogaysiinta

Bixiyayaasha waxaa looga baahan yahay inay ogeysiyaan UCare haddii lagu dhigo isbitaal, xarunta daryeelka muddada dheer (LTAC), Dib u Dejinta Bukaani Jifka ee Daran (AIR), Xarunta Kaaliyaha Caafimaadka Xirfadlaha ah (SNF) ama Swing Bed. Kooxda caafimaadka UCare waxay si dhaw ula hsaqaynayaan xirflayaasha caafimaadka si ay u xaqiijiyaan in aad hesho daryeelka daruuriga ah ee aad u baahan tahay. Sidoo kale, kooxda caafimaadka UCare waxay kaa caawin karaan isku duba dirta daryeelka isbitaal dhiga kadib haddii ay daruuri noqoto ama loo baahdo..

Ogolaanshaha

Adeegyada qaarkood waxay u baahan yihiin oggolaanshaha UCare. Oggolaanshahan waa inuu dhacaa kahor, inta lagu jiro ama waxyar kadib marka adeegga la dhammeeyo. Daryeel bixiyahaaga ayaa mas'uul ka ah helitaanka oggolaanshaha. Tani waxay khusaysaa labada bixiyayaasha ku jira ama ka baxsan dalada UCare.

Ogolaanshah hore, sidoo kael loo yaqaan naqdinta adeega kahor, waxaa weeye marka bixiyahaagu ay tahay inuu siiyo macluumaadka UCare oo uu dalbado oggolaanshaha *kahor* inta aanad helin adeega. Haddii adeegu u baahan yahay oggolaanshe hore, waxaa kaliya lagu dabaqaa deeqda.

Degdega wakhtigan iyo naqdinta wakhtigan badanaa waxay ka dhacdaa Daryeelka Xanuunka Daran ee Mudada Dheer ah (LTAC) ama Xarunta Kaaliyaha Caafimaadka Xirfadlaha ah (SNF). Tani waxay u ogolaanaysaa UCare inay naqdinto qorshaahaga daryeelka. Inta uu socoto naqdintu, UCare waxay gacan ka gaysan doontaa qaar kamid ah daryeelada aad u baahan tahay si loo balaadhiyo ama haddii daryeelku ka duwan yahay loo dalbado.

Dib u eegis adeegga kadib ayaa loo baahan yahay haddii dhakhtarkaagu aanu codsan dib u eegis kahama adeegga. Cabashadaada waxaa laga yaabaa in markii hore la diiday sababtoo ah oggolaanshaha ayaa looga baahan yahay caymiska. Dhakhtarkaagu waa inuu macluumaadka siiya UCare si ay dib u eegis ugu sameyso. Kooxda caafimaadka ee UCare ayaa dib u eegi doonta qorshahaaga daryeelka si ay u hubiyaan inaad hesho caymiska aad xaqa u leedahay xubin UCare ahaan.

Si loo sameeyo go'aan caymis, kooxda daawaynta ee UCare waxay qiimeeyaan haddii adeeggu caafimaad ahaan lagama maarmaan u yahay, ku habboon yahay oo waxtar u leeyahay baahiyahaaga.

Haddi aanu diidno codsi uu adiga ama dhakhtarkaagu noo soo diray, adiga ama dhakhtarkaagu waxa aad rafcaan ka qaadan kartaan go'aankayaga. Markaad xerayso rafcaan, adiga ama dhakhtarkaagu waxa aad soo gudbin kartaan dukumeenti dheeraad ah. Dhakhaatiirtu waxay dib u eegaan dalabka rafcaanka iyo caddaynta caafimaadka hadda iyo dheefaha qorshahaaga. Haddii rafcaankaaga la diido, waxaa aanu ku siin doonaa macluumaad ku saabsan sida loo xareeyo rafcaanka heerka labaad.

Macluumaadka dheeraadka ah, booqo **ucare.org**.



PO Box 52
Minneapolis, MN 55440-0052

612-676-3200 ama 1-800-203-7225 (wicitaankan waa bilaash)
TTY: 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wicitaankan waa bilaash)
8 subaxnimo – 5 galabnimo, Isniinta - Jimce

ucare.org

U13757 Somali (U2544) (12/2024) © 2023 UCare. Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin.